

# WARBIXINTA
# WAX-QABADKA **HAY'ADDA SHAQAALAHA DAWLADDA**
# EE SANNADKA
# 2020

***Warbixintan Waxa diyaarisay:***

*Waaxda qorshaynta siyaasadaha odoroska iyo istiraatiijiyadda ee Hay'adda Shaqaalaha Dawladda*

***Web**: https://csc.govSomaliland .org*

*December, 2020*

***Hay'adda Shaqaalaha Dawladda JSL***

***E-mail**: chairman@cscSomaliland .org*

***E-mail:** planning@cscSomaliland .org*

***E-mail:** cssp.communication@cscSomaliland .org*

***Ciwaanka:** Degmada 26ka June, ka soo horjeedka Deero Mall*

***Xuquuqda daabacaada warbixintani waxa ay u ilaashan tahay ama oggolaanshadeeda ka masuul ah Hay'adda Shaqaalaha Dawladda JSL.***

## Contents

HORDHAC ... VI

FARRIINTA GUDDOOMIYAHA ... VII

1. HAY'ADDA SHAQAALAHA DAWLADDA ... 1

1.1 Mudnaanaha Hawl-qabadka Hay'adda Shaqaalaha Dawladda ... 1

1.2 HIMILADA (VISION) ... 2

1.3 HIIGSIGA (MISSION) ... 2

1.4 MABAADII'DA AASAASIGA AH EE HAY'ADDA SHAQAALAHA DAWLADDA ... 2

2. WARBIXINTA WAXQABADKII SANNADKA 2020 ... 4

2.1 DHAMAYSTIRKA DIIWAANGELINTA SHAQAALAHA DAWLADDA ... 4

2.2 DIIWAAGALINTA IYO QAYBINTA SHAQAALAHA SHAQO QARAN ... 6

2.3 DIIWAANGELINTA IYO HUBINTA SHAQAALAHA KU MEEL GAADHKA AH ... 8

3. TABABARRADA SHAQAALAHA WASAARADAHA IYO HAY'ADAHA DAWLADDA ... 14

3.1 TABABARRADA WAAXDA CUDUDDA SHAQAALAHA DAWLADDA ... 14

3.2 TABABARRADA INDHO-FURKA EE SHAQAALAHA CUSUB (INDUCTION TRAININGS) ... 14

3.3 TABABARRADA LA XIDHIIDHA QIIMAYNTA HAWL-QABADYADA ... 15

3.4 TABABARRADA GAAGAABAN IYO KUWA DHAADHEER ... 17

4. DARAASADAHA IYO CILMI BAADHISTA LA DIYAARIYEY ... 21

4.1 DARAASADDA CAAFIMAADKA SHAQAALAHA DAWLADDA ... 21

4.2 QAAB-DHISMEEDKA WASAARADAHA ... 22

4.3 BARNAAMIJKA HAWL-GABKA SHAQAALAHA DAWLADDA ... 23

4.3.1 QORSHAHA HORUMARINTA HAWL-GABKA QARANKA ... 26

4.4 HIRGELINTA BARNAAMIJKA E-SHILING ... 29

5.1 SAMAYNTA XAFIISKA KAYDKA XOGTA SHAQAALAHA DAWLADDA (CIVIL SERVICE EMPLOYEE ARCHIVE) ... 30

5.2 SAMAYNTA IYO XOOJINTA WAAXDA CUDUDDA SHAQAALAHA DAWLADDA ... 33

5.3 SAMAYNTA WAAXDA ICT EE GUUD AHAAN WASAARADAHA IYO HAY'ADAHA DAWLADDA ........ 34

6. QALABAYNTA IYO DHISMAYAASHA CUSUB EE XAFIISYADA ........ 36

6.1 DHISMAHA CUSUB EE HOOLKA HAY'ADDA SHAQAALAHA DAWLADDA ........ 36

6.2 DHISMAHA XAFIISYADA HAWL-GABKA QARANKA ........ 36

6.3 QALABAYNTA XAFIISYADA KALA DUWAN EE HAY'ADDA SHAQAALAHA DAWLADDA . ........ 37

6.3 QALABAYNTA KU WAREEJINTII WASAARADAHA QORSHAYNTA QARANKA, CADAALADDA IYO GAASHAAN DHIGA ........ 38

7. XOGAHA SHAQAALAHA DAWLADDA – KORODHKA, DALLACAADAHA IYO WAREEJINTA SHAQAALAHA ........ 40

7.1 SHAQAALAHA LA SHAQAALEYEY ........ 40

7.2 SHAQAALAHA LA DALLACSIIYAY ........ 40

7.3 SHAQAALAHA HOOS LOO DHIGAY ........ 41

7.4 SHAQAALAHA LA WAREEJIYEY ........ 41

7.5 SHAQAALAHA LA ANSHAX MARIYAY ........ 41

7.6 SHAQAALAHA LOO OGGOLAADAY FASAXYADA WAXBARASHO ........ 42

8. QAADASHADII WEJIGA LABAAD EE SHAQAALAHA BARNAAMIJKA HIBADA IYO HAL-ABUURKA (TMP) ........ 43

8.1 QAADASHADA SHAQAALAHA IYO XUBNAHA XIDHIIDHIYAASHA XOGTA COVID-19 EE SADDEXDA GOBOL EE M/JEEX, AWDAL IYO TOGDHEER ........ 45

9. TAYAYNTA MAAMULKA SHAQAALAHA CISBITAALKA GUUD EE HARGEYSA 46

9.1 DIYAARINTII WARBIXINTA SHAQAALAHA CISBITAALKA GUUD ........ 46

9.2 DIYAARINTA QAAB DHISMEEDKA CUSUB EE CISBITAALKA GUUD EE HARGEISA ........ 47

9.3 NAADINTII IYO QAADASHADII SARAAKIISHA CUSUB EE CISBITAALKA HARGEISA ........ 48

10. BAADHITAANADDA IYO KORMEERADDA LA SAMEEYAY ........ 52

10.1 BARNAAMIJKA HUBINTA IYO BAADHIDA XOGTA SHAQAALAHA DAWLADDA (PAYROLL, HR MINI AUDITING) ........ 52

10.2 BAADHITAANADA IYO KORMEERADA KALE EE LAGU SAMEEYAY WASAARADAHA IYO HAY'ADAHA DAWLADDA. ........ 57

11. SIYAASADAHA IYO HABRAACYADDA LA SAMEEYAY SANNADKA 2020KA 58

11.1 HAGAHA HAB MAAMUUSKA QARANKA ........ 58
11.2 DIYAARINTA SIYAASADDA IYO XEERKA HAWL-GABKA QARANKA ........ 59
12. SHIRARKA IYO AGAASIMKA XAFLADAHA LAGU DARDAR GALIN AYO HAWLAHA SHAQO ........ 59
12.1 SHIRKII WADA TASHIGA XEERKA IYO SIYAASADDA HAWL-GABKA QARANKA ........ 60
12.2 KULANKII WADA TASHIGA AGAASIMAYAASHA GUUD EE WASAARADAHA ........ 60
12.3 KULANKA SADEX-BILOODLAHA AHAA EE GUDIGA MASHRUUCA ........ 61
12.5 QABANQAABADA SHIRKA DHAQANGALINTA QORSHAHA SANNADKA 2020KA EE HAY'ADDA SHAQAALAHA DAWLADDA ........ 64
13. BILLADAHA IYO ABAALMARINAHA AY HAY'ADDA SHAQAALAHA DAWLADDU SANNADKAN HESHAY ........ 68
13.1 BILADDA ABAAL MARINTA SHAQO WANAAGA EE XISBIGA UCID GUDOONSIIYEY GUDOOMIYAHA HAY'ADDA SHAQAALAHA DAWLADDA . ........ 68
13.2 BILADDA MAC-HADKA DARAASAADKA IYO HORUMARINTA SOMALILAND EE HIIGSI QARAN GUDOONSIIYEEN GUDOOMIYAHA HAY'ADDA SHAQAALAHA DAWLADDA (SOMALILAND NATIONAL AWARD) ........ 70
14. HESHIISYADDA HAY'ADDA SHAQAALUHU SANNADKAN GASHAY ........ 72
14.1 HESHIISKA MAC-HADKA SHAQAALAHA DAWLADDA EE CSI IYO MAC-HADKA SHAQAALAHA EE DALKA GHANA (GIMBA) ........ 72
14.2 HESHIISKII DHANKA LUUQADAHA EE MAC-HADKA DALKA ENGIRIISKA LALA GALAY ........ 73
15. QORAALADDA CODSIYADDA LOO DIRAY HAY'ADAHA KA BAXSAN DAWLADDA. ........ 74
16. QORSHAHA SANADKA SOO SOCDA 2021KA ........ 76
17. GUNAANAD ........ 81

## HORDHAC

Hay'adda Shaqaalaha Dawladda Somaliland waxa la asaasay sannadkii 1993 iyada oo aasaaskeedu waafaqsan yahay Dastuurka Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland . Hay'addu waxa ay u taagan tahay dhismaha, tayaynta, tababarka, daryeelka, xaqsiinta iyo dabagalka shaqada iyo shaqaalaha dawladda guud ahaan si shaqada iyo adeegyada bulshadu u noqdaan kuwo sarreeya una noqdaan shaqaaluhu kuwo udub dhexaad u ah horumarka guud ee qaranka.

Sidoo kele ujeeddooyinka ugu muhiimsan ee laga leeyahay jiritaanka iyo aasaaska Hay'adda Shaqaalaha Dawladda waa in la helo maamul iyo qawaaniin dejisan oo lagu maamulo guud ahaan shaqaalaha dawladda iyo in laga jawaabo aragtida muddada jirtay ee ah in nidaamka maamulka cududda shaqaalaha dawladdu u baahanyahay Hay'ad gaar u ah oo diyaarisa hab maamulkooda suubban, siyaasadaha, shuruucda iyo hab-raacyada maamulka cududda shaqaalaha dawladda.

Sidaa darteed shaqaalaha dawladdu waa halbawlaha ugu muhiimsan ee socodsiiya adeegyada guud ahaan wasaaraddaha iyo Hay'adaha dawladdu u qabtaan muwaadiniinta iyo dadka ajaanibka ah ee dalka u yimaadda hawlo maalgashi ama dano kale oo la xidhiidha horumarinta dalkeenna.

Hay'adda Shaqaalaha Dawladdu waxa ay samaysaa sannad kasta dadaal dheeraad ah oo ka turjumaya fulinta waajibaadka ay u taagan tahay ee kor ku xusan, iyada oo soo saarta sannad kasta warbixino la xidhiidha wixii u qabsoomay una gudbisa xafiiska madaxwaynaha iyo dhamaanba hay'adaha dawladda iyo guud ahaan bulshada si shaqadeedu u noqoto mid sugan oo ku dhisan isla xisaabtan, banyaalnimo iyo daah furnaan siin karta bulshad in ay ka soo fal celin karaan si loo sii tayeeyo meelaha u baahan in la xoojiyo loona ogaado kaalinta Hay'adda Shaqaalaha Dawladdu ugu jirto Qaranka JSL.

# FARRIINTA GUDDOOMIYAHA



Allah Ayaa Mahad oo Dhan Iska Leh, Nabad gelyo iyo Naxariista Ilaahayna Korkiisa Ha Ahaato Nebigeennii Muxammad CSW.

Waxa sharaf wayn inoo ah in aanu halkan idinkula wadaagno warbixin sannadeedkii 2020 oo koobsanaya dhamaan waxii hawl u qabsoomay Hay'adda Shaqaalaha Dawladda JSL sannadkaas. Waxa hubaal ah in qaran kasta oo aduunka guudkiisa jira horumarkiisu ku xidhan yahay hadba inta uu u fekero cududdiisa shaqaalaha loona tayeeyo aqoontooda, hal-abuurkooda si cududda shaqaaluhu u noqoto mid tayo sarraysa leh oo horumar keeni karta.

Hay'adda Shaqaalaha Dawladda JSL Sannadka 2020, iyada oo raacaysa Qorshaha Hawl-qabadka Sannadlaha ah ee laga soo dheegay Qorshaheeda Istiraaatiijayadeed ee shanta sanno (5 Years Strategy Plan), waxa ay ku guulaysatay in ay si buuxda u dhamaystirto una fuliso hawlihii loo qorsheeyay.

Dhamaan hawlaha inoo qabsoomay sannadka 2020 ee dhamaaday waxa ay qayb ka tahay dadaalka xukuumadda, iyada oo la raacayo talada Madaxwaynaha JSL Mudane Muuse Biixi Cabdi kana go'an tahay Hay'adda Shaqaalaha Dawladda sidii aqoonta, adeeg bixinta iyo dadaalka hawl-qabadka ee Shaqaalaha Dawladu u noqon lahaa mid tayo sare leh, iyada oo la dejinayo lana saaray diiradda dejinta habab, xeerar iyo qaab dhismeedyo wata shaqo-qeexisyo qof kasta oo shaqaale ahi uu yaqaan shaqada uu u hayo qaranka marka uu dhex joogo wasaaraddiisa iyo hay'addiisa. Run ahaantii, waxa aynu ku guulaysanay in aynu soo saarro qabyo-qoraalka xeerka shaqaalaha Dawladda oo markii ugu horaysay taariikhda JSL la horgeeyay Golaha Wasiirrada JSL, iyada oo ay golaha wasiirradu ansixiyeen una gudbiyeen Baarlamaanka si ay waajibaadkooda sharci uga gutaan. Waxa aynu wax ka beddelnay oo casriyayn lagu sameeyay qaab-dhismeedka wasaaradaha iyo Hay'adaha Dawladda intooda badan, waxa aynu soo saarnay qabyo-qoraalka xeerka iyo siyaasadda hawl-gabka Shaqaalaha Dawladda markii ugu horraysay taariikhda JSL, iyada oo la qaatay in sannadka 2021 la hirgeliyo nidaamka Hawl-gabka Qaranka oo xaqiijinaya xaquuqda dadka gaadhay da'da hawl-gabka.

Warbixintani waxa ay si cad wax uga iftiimin doontaa wixii qabsoomay oo ku yimi dadaalka, tamarta iyo dhaqaalaha aynu gelinay hawlaha la qabtay oo run ahaan aan ku ammaanayo masuuliyiinta xubnaha Komishanka, Agaasimaha Guud ee Hay'adda Shaqaalaha , Agaasime Waaxeedyada, Saraakiisha iyo guud ahaan Shaqaalaha waaxyaha oo la'aantood aanay suurta gasheen in guulaha sannadkaa 2020 la gaadhay ay noqdaan qaar sidii la rabay u fulay.

Sidoo kele waxa xusid mudan kaalinta masuuliyiinta Mac-hadka Shaqaalaha Dawladda oo qayb laxaad leh ka ahaa tababarrada guud ahaan shaqaalaha la siiyay iyo fulinta daraasaadka loo baahdo ee la xidhiidha tayaynta aqoonta iyo xirfada shaqaalaha Dawladda. Waxa aynu bilownay daraasad

cilmiyeed dhamaystiran oo iba-bixin doonta hirgelinta barnaamij caafimaad oo ay helaan shaqaalaha Dawladdu kaas oo la jaan qaadaya awooddooda dhaqaale si loo sugo badqabka caafimaadka shaqaalaha.

Waxa iyana mudan in aan halkan ku xusno Xubnaha Guddida Guud (Steering Committee) ee Barnaamijka Dib u habaynta Shaqaaalaha iyo Guddida Farsamada (Technical Committee) iyo Masuuiyiinta Mashruuca Dib u habaynta Shaqaalaha ee Baanka Adduunka iyo madaxda Baanka Adduunka oo run ahaan qayb farsamo oo wayn ka qaatay socodsiinta hawlaha inoo qabsoomay.

Ugu danbayn, sannadkan galbaday ee 2020, waxa aynu ka baranay casharro iyo waayo aragnimo u baahan in Sannadka soo socda ee 2021 uga faa'iidaysano si aynu u sii labanlaabno dadaalkeena ku aaddan taabbo-gelinta hawlaha inoo qorshaysan oo iyaga oo dhamaystiran ahna qorshaha hawl qabadka sannadka 2021 xaga danbe kaga lifaaqan warbixintan.

Waxa aan ammaan balaadhan halkan uga celinayaa Madaxwayahaha JSL, Mudane Muuse Biixi Cabdi iyo xubnaha Golaha Wasiirrada oo taageero ballaadhan oo dhan kasta ah iyo dhiirri gelin nala garab taagan had iyo jeer kuna shaqaynaynoo siyaasaddooda.

**Waxa aan inoo rajaynayaa guul iyo gobonimo**

**Farxaan Aadan Haybe**

**Guddoomiyaha Hay'adda Shaqaalaha Dawladda JSL**

# 1. HAY'ADDA SHAQAALAHA DAWLADDA

Hay'adda Shaqaalaha Dawladda Somaliland waxa la asaasay sida aan kor ku xusnay sannadkii 1993kii, iyada oo aasaaskeedu waafaqsan yahay Dastuurka Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland . Hay'addu waxa ay u taagan tahay dhismaha, tababarka, daryeelka, xaqsiinta iyo dabagalka shaqada iyo shaqaaalaha dawladda guud ahaan.

Waajibaadka Hayadda Shaqaalaha Dawladda waxa laga dheegay Dastuurka qaranka jamhuuriyada Somaliland qodobka 35aad Farqdiisa labaad oo tilmaamaya Sharciga Shaqaalaha Dawladda **Law Lr.7/96** oo soo baxday 11th March, 1996kii.

Hay'adda Shaqaalaha Dawladdu waa Guddi Komishan oo Ku aasaasan xeer Madaxweyne. Qaab-dhismeedkeedu waxa uu ka kooban yahay xafiiska gudoomiyaha oo guddoomiya guddida Hay'adda Shaqaalaha , Agaasimaha guud iyo 7 waaxood iyo 5 xafiis oo toos ugu tabiya ama hoos yimaadda Gudoomiyaha.

## 1.1 Mudnaanaha Hawl-qabadka Hay'adda Shaqaalaha Dawladda

Hay'adda Shaqaalaha Dawladu, waxa ay dejisay qorshe hawl qabad oo shan sanno ah kaas oo ku qotoma qorshaha horumarinta qaranka JSL, qorshahaas oo loo raaco waxii hawl ay qabanayso sannad kasta hay'addu. Lixdan bar-tilmaameed ee hoos ku shaxaysani waa tiirarka uu ku fadhiyo qorshaha shanta sano ee Hay'adda Shaqaalaha Dawladdu (CSC Five Years Strategic Plan), waxana loo xushay in ay yihiin kuwa ugu mudan ama ugu muhiimsan ee ay ka farcamayaan shaqooyinka ay qaranka u hayso Hay'adda Shaqaalaha dawladdu, waana kuwa aasaaska u ah qorshe sannadeedka 2020ka ee Hay'adda.




***Xigasho: 2020, Waaxda Qorshaynta Ee HSHD***

## 1.2 HIMILADA (VISION)

Hiigsiga Hay'adda Shaqaalaha Dawladdu waa in ay noqoto mid si caalami ah loogu aqoonsado xarun sharafeedka bixisa heerka ugu Sarreeya ee adeegga dadweynaha, kaas oo ay bixinayaan xirfadlayaasha, khubarada iyo cududda shaqaalaha ee dalkooda jeceli.

## 1.3 HIIGSIGA (MISSION)

In la tayeeyo adeegga shaqada iyo shaqaalaha dawladeed, xidhiidhka shaqaalaha, hoggaanka iyo horumarinta hay'adaha Dawladda kuwaas oo joogtaynaysa isla markaana kor u qaadaya adeegga dadweynaha ee jamhuuriyadda Somaliland .

## 1.4 MABAADII'DA AASAASIGA AH EE HAY'ADDA SHAQAALAHA DAWLADDA

Hay'adda Shaqaalaha Dawladda waxa haga waajibaadka shaqo ee ay qaranka u hayso mabaadii' iyo qiyam Sarreeya oo lagu ilaaliyo shaqada iyo qiyamka guud ee uu farayo dastuurka iyo sharciga shaqaalaha dawladda, mabaadii'da aasaasiga ah ee Hay'adda Shaqaalahana waxa ka mid ah:

| Mabaadii'da Asaasiga ah | Faahfaahin |
|---|---|
| 1. **Isku Duubni** | Danta Guud oo laga horumariyo danta gaarka ah |
| 2. **Daacadnimo** | Dadweynaha oo loogu adeego si daacad ah |
| 3. **Hadaf** | In dadweynaha loogu shaqeeyo si siman – Go'aan qaadashadana lagu saleeyo xaqiiqooyin ama caddaymo |
| 4. **Dhexdhexaadnimo** | In hadaf isku mid ah loogu adeego dadweynaha iyo gobollada dalka |
| 5. **Xirfad** | In si xirfadi ku dheehan tahay oo heerkeedu sarreeyo loo guto waajibaadka iyo gaadhsiinta adeegga |
| 6. **Hufnaan** | In si hunfaani ku jirto oo daah furan loo qabto shaqooyinka oo dhan oo ay ku jirto bixinta adeegyadu |
| 7. **Waddaniyad** | In la muujiyo dareen waddaniyadeed iyo aqoonsi shakhsiyadeed oo ah muwaaddin Somaliland  u dhashay |
| 8. **Sinnaan iyo cadaalad** | In si siman loo qaybsado khayraadka iyo faa'iidooyinka ka soo baxa barnaamijyada iyo mashaariicda ay waddo Hay'adda Shaqaalaha  Dawladdu, isla markaana si caddaalad iyo daah furnaan ah loogu tartamo boosaska shaqo ee banaanaada. |

***Ugu dambayn mabaadiidaas waa in laga dhex arkaa shaqo kasta oo ay Hay'adda shaqaaluhu qabato***

***Ilaalinta mabaa'diidaas waxaa masuulka ah xubnaha gudiga Hay'adda shaqaalaha dawladda oo uu hor kacayo gudoomiyaha Hay'adda shaqaalaha dawladda.***

***Xigasho: 2020, Waaxda Qorshaynta***

## 2. WARBIXINTA WAXQABADKII SANNADKA 2020

Hay'adda Shaqaalaha Dawladdu waxa ay sannadka 2020 qabatay hawlo muhiim u ah taabbo-gelinta iyo tayaynta cududda shaqaalaha dawladda JSL, iyada oo raacaysa qorshaha horumarinta qaranka iyo qorshe sannadeedka Hay'adda Shaqaalaha Dawladda oo salka ku haya qorshaha shanta sano ee Hay'adda Shaqaalaha iyo qorshe sannadeedka mashruuca dib u habaynta shaqaalaha dawladda oo isla jaanqaaday.

Haddaba, hawl-qabadyada hay'adda shaqaaluhu fulisay ama dhamaaday sannadka 2020ka kuwooda ugu muhiimsani waa kuwan hoos ku xusan iyaga oo faah faahsan:

## 2.1 DHAMAYSTIRKA DIIWAANGELINTA SHAQAALAHA DAWLADDA

Waxa ay ahayd horraantii sannadkii 2018, markii Hay'adda Shaqaalaha Dawladda oo gacan ka helaysa mashruuca dib u habaynta shaqaalaha dawladda (CSSP) ee Baanka Aduunku, ay hirgalisay barnaamij balaadhan oo lagu tirakoobayo isla markaana lagu diiwaan gelinayo dhamaan shaqaalaha dawladda ee ku sugan goboladda iyo degmooyinka dalka.

Shaqaalaha xilligaas la diiwangeliyay ayaa ahaa kuwa xeerka Shaqaalaha dawladdu dhigayay in ay Haya'adda Shaqaaluha toos u hoos yimaaddaan waxaana markaas aan ku jirin ciidamada kala duwan, dawladaha hoose, baanka dhexe, wakaaladaha biyaha, dekedaha, haamaha shidaalka, iwm. Kuwaas oo shaqaalahooda ka mushahar siiya dakhliga dawladda ee ay ka soo xereeyaan adeegyada ay bulshada u qabtaan. Maadaama dib u eegis iyo wax ka beddel lagu sameeyay xeerka shaqaalaha dawladda sannadkan, dhamaan shaqaalahaa aan soo sheegnay marka laga reebo ciidamahu waxa ay hoos imanayaan shaqaalaha dawladda waxaana qorshaysan in sannadka dambe ee 2021 ka la diiwaangeliyo.

Markii barnaamijka tirikoobka shaqaalaha dawladdu soo gabagaboobay, waxa ay Hay'adda Shaqaaluhu joojisay xilligaas boosas shaqo oo tiro badan, kuwaas oo si sabab la'aan ah loo waayey loona aqoonsaday shaqaale aan jirin (gost workers), waxana laga saaray liiska mushahar-bixinta shaqaalaha dawladda.

Muddo ka dib, waxa ay Hay'adda Shaqaalaha Dawladdu buuxisay boosaskii shaqo iyada oo imtixaano loogu tartamaayo kaalmahaas shaqo laga fuliyey dhamaanba gobollada dalka, halka wasaaradaha horumarinta caafimaadka, waxbarashada iyo sayniska, deegaanka iyo xannaanada xoolaha duruufo gaara dartood loo tix geliyey lana shaqaaleeyay shaqaale tiro badan oo kula shaqaynayay wasaaradahaas si tabarruc ah mudo badan, iyada oo shaqaalahaas lagu buuxiyey boosaskii uu banneeyay tirakoobkaasi adeegyadda muhiimka ah ee ay shacabka u hayaan dartood lana diiwaangeliyey.




***Xigasho: 2020 Diiwaangelinta shaqaalaha, Ceerigaabo, Sanaag***

Sidoo kele isla-xilligaas waxa jiray shaqaale aan marin diiwaan-galinta Hay'adda Shaqaalaha Dawladda oo ku maqnaa sababo la xaqiijiyey sida fasax sannadeedka caadiga ah, fasaxyo caafimaad iyo kuwo waxbarasho, kuwaas oo sharciga shaqaaluhu u ogolaanayay in ay ku sii jiraan liiska mushahar bixinta shaqaalaha dawladda isla markaana la diiwaangaliyey.

Waxa sidoo kele jiray shaqaale badan oo si kumeel gaadh ah (temporary) ku joogay wasaaradaha iyo Hay'adaha qaranka, kuwaas oo markii dambe waaxda shaqaalaysiinta ee Hay'adda Shaqaalaha Dawladdu shaqaalaysiisay isla markaana ka qaadday imtixaanno ay ku soo gelayaan liiska shaqaalaha dawladda, halka kuwo kalena ay u samaysay qiimayn kuwaas oo ku soo biiray shaqaale waynaha qaranka waajibna ay noqotay in la diiwaangeliyo shaqaalahaas maadaama ay ku soo biireen liiska shaqaale waynaha qaranka.

Sidoo kele, waxa jiray shaqaale ku yimi qaab isku beddel ah oo ay Guddiga Hay'adda Shaqaalaha Dawladdu ku qanacday in lagu badalo shaqaale hore si iskood ah uga tegey shaqada dawladda iyo kuwo galay xaalad caafimaad oo la xaqiijiyay in aanay shaqada sii wadi karin iyo kuwo iyagu geeriyooday Alle ha u naxariistee oo loo baahday in boosaskoodii shaqo la buuxiyo.

Dhamaanba shaqaalaha aan kor ku soo sheegnay, wadar ahaan waxa ay dhamaayeen tiro badan oo xogtoodu ka maqan tahay xog-kaydiyaha iyo data-base ka Hay'adda Shaqaalaha dawaladda kuwaas oo ay lagama maarmaan noqotay in la diiwaan geliyo, sidaas darteed sannadkii hore ee 2019ka ayaa la diiwaan galiyey intoodii ugu badnayd iyada oo sannadka 2020ka horraantiisiina la dhamaystiray intii ka dhinnayd ee aan hore isu diiwaan gelin iyada oo ujeeddooyinka iyo

qodobbada ugu muhiimsan ee laga lahaa diiwaan gelinta shaqaalaha dawladda ee sannadkanna ay ahaayeen qodobadan hoos ku xusan;

- Helitaanka xogta shaqaalaha dawladda oo dhamaystiran isla markaana sugan
- In ay fududaato hirgelinta barnaamijka E-Cash ee Shaqaalaha Dawladdu mushaharooyinkooda ku qaadanayaan hab casri (online) ah oo Baanka dhexe, Hay'adda Shaqaalaha Dawladda iyo shirkadaha isgaadhsiintu ka wada shaqeeyeen.
- In la diiwaan geliyo shaqaalihii cusbaa ee aan ku jirin diiwaanka ama xog-kaydiyaha (Serverka) Hay'adda Shaqaalaha Dawladda si xogtooda loo sugo, lana siiyo kaadhadhkii shaqaalaha (Employee ID).
- In la hubiyo jiritaanka iyo sugnaanshaha shaqaalihii fasaxyada sharciga ah kaga baaqday diiwaan gelintii hore si aan caagle ama shaqaale aan jirin oo aan la hubin xogtiisu u soo galin mar kele liisaska mushahar bixinta shaqaalaha dawladda.
- In shaqaalaha loogu tago goobahooda shaqada iyada oo kulanno is daba jog ah lala qaadanayo masuuliyiinta shaqaalahaas si loo dardar geliyo hawlaha adeeg ee ay shacabka u hayaan isla markaana la dareensiiyo in lagu daba joogo shaqaalaha iyo shaqada ay shacabka u hayaan.

## 2.2 DIIWAAGALINTA IYO QAYBINTA SHAQAALAHA SHAQO QARAN

Barnaamijka Shaqo Qaran oo ah barnaamij uu hindisihiisa iyo hal-abuurkiisaba lahaa madaxwaynaha Jamhuuriyadda Somaliland Mudane **Muuse Biixi Cabdi**, ujeeddadiisuna ahayd shaqo carbis iyo tababar ay weheliso is dhexgal bulsho iyo in dhaliyarada lagu abuuro waddaniyad iyo dal jacayl, iyo in marka ay dhamaystaan barnaamijkaas ay toos ugu biiraan shaqaale waynaha qaranka Jamhuuriyadda Somaliland , iyada oo dufcaddii ugu horraysay oo tiradoodu dhan tahay 1203 xubnood uu xafiiska barnaamijka Shaqo Qaran ku soo wareejiyay Hay'adda Shaqaalaha Dawladda si loo hubiyo xogtooda looguna qaybiyo wasaaradaha iyo Hay'adaha dawladda.

Hadaba, 25 kii August 2020ka waxa degmada Boorame ee gobolka Awdal ka bilaabmay diiwaangalinta xubnihii ugu horeeyay ee dufcadii koobaad ee barnaamijka Shaqo Qaran iyada oo gobollada iyo dagmooyinka dalka oo dhan laga diiwaan geliyey gobol kasta tiradii xubnahaas Shaqo Qaran ee ku sugnayd ama ka soo xaadiray goobta diiwaan gelinta.



*Qaar ka mid ah xubnaha Shaqo Qaran oo ka mid noqday Hay'adda Shaqaalaha Dawladda*

10 September, 2020kii ayaa la soo gabo-gabeeyay diwaa gelinta dufcaddii koobaad ee xubnaha barnaamijka Shaqo Qaran ee dalka oo dhan iyada oo la sugay dhamaanba xogtii looga baahnaa oo ay ku jirto xaqiijinta magacyadooda rasmiga ah iyo xaqiijinta shahaadooyinka waxbarasho ee ay sitaan iyo in ay ku jiraan xubno shaqaale dawladeed hore u ahaa iyada oo la isticmaalayo nidaamka iyo barnaamijka casriga ah ee biometric systemka oo sawirayay faraha iyo indhaha qofka shaqaalaha ah.



***Xigasho: 2020, Liiska shaqaalaha Shaqo Qaran ee lagu wareejiyey Wasaaradda Maalgashiga***

Ugu dambayna 16 October, 2020ka ayaa xafladda shaacinta liiska shaqaalaha Shaqo Qaran ee ansaxa ah iyo xubin walba oo ka mid ah liiska ansaxa ahi halkii uu ka hawlgalilahaa lagu qabtay

xafiiska Hay'adda Shaqaalaha Dawladda iyada oo la shaaciyey darajooyinka shaqaalahaas iyo xubin kastaa wasaaradda iyo hay'adda dawladeed ee uu ka hawl gali doono.

Xafladda shaacinta liiska iyo darajooyinka shaqaalaha barnaamijka Shaqo Qaran waxa ka soo qaybgalay agaasimaha barnaamika Shaqo Qaran, iyada oo xogta darajooyinka shaqaalahaas oo la waafajiyey shahaadooyinka ay la yimaadeen goobta diiwaan gelintana ay ahayd sidan hoos ku cad:

| Darajooyinka | Tiradda Shaqaalaha |
|---|---|
| **Darajadda A** | **1027** |
| **Darajadda B** | **140** |
| **Darajadda C** | **11** |
| **Darahadda D** | **8** |
| **Wadarta Guud** | **1,186** |

***Xigasho: 2020, Waaxda ICT/Waaxda Qorshaynta qaybta Statistikada***

## 2.3 DIIWAANGELINTA IYO HUBINTA SHAQAALAHA KU MEEL GAADHKA AH

Dib u habaynta shaqaalaha dawladdu waa mudnaanta koobaad ee Dawladda Somaliland, waxana ay qayb muhiim ah ka tahay tiirka maamulka (Governance Pillar) ee ku xusan Qorshaha Horumarinta Qaranka ee (NDP2), oo ah mid ka mid ah go'aamada iyo siyaasadaha taageeraya guud ahaan dawladda iyo dib-u-habaynta shaqaalaha dawladda.

Hadaba, Hay'adda Shaqaalaha Dawladda oo u taagan dhismaha, tababarka, daryeelka, xaqsiinta iyo dabagalka shaqada iyo shaqaaalaha dawladda guud ahaanba, waxa ay baryahan dambe horumar la taaban karo ka samaysay dhinacyada dib u-habaynta qaab dhismeedka, kor u qaadida tayada shaqaalaha, tababarrada, dejinta shuruucda, dhamaystirka tirakoobka shaqaalaha iyo ballaadhinta adeegga hay'adda oo la gaadhsiiyay gobollada iyo dagmooyinka dalka oo dhan, iyada oo ay marwalba jiraan caqabado iyo duruufo gaar ah oo ka horyimaadda dhamaystirka shaqooyinkan, waxanay Hay'adda Shaqaalaha Dawladdu la tacaalaysaa in ay yarayso caqabadahan si ay u gaadho ujeeddooyinka hiigsiga iyo himilooyinka guud ee u calaamadsan Hay'adda Shaqaalaha Dawladda kuwaas oo uu si cad u tilmaamayo qorshaha shanta sanno ee Hay'adda Shaqaalaha dawladdu.

Caqabadahan waxa kamid ah shaqaale tiro badan oo si ku meelgaadh ah u jooga dhamaan xarumaha wasaaradaha iyo hay'adaha qaranka ee gobollada iyo dagmooyinka dalka, iyada oo sharciga shaqaalaha dawladdu aanuu oggolayn shaqaale aan la aqoon sida ay ku yimaadeen isla markaana ku meel gaadh ah oo ka shaqeeya xarumaha adeeg bixinta ee wasaaradaha iyo Hay'adaha qaranka.

Si haddaba xal loogu helo hawshan, waxa ay waaxda qorshaynta ee Hay'adda Shaqaalaha Dawladdu ka diyaarisay sannadkii 2019kii warbixin faahfaahsan oo tilmaamaysa sida ay ku yimaadeen iyo caqabadaha ay ku hayaan goobaha mashquulka badan ee adeeg bixinta iyo soo jeedimaha qodobbada xal u noqon kara shaqaalahaas kumeel gaadhka loo bixiyay. Warbixintan ayaa Guddoomiyaha Hay'adda Shaqaalaha Dawladdu la wadaagay una sharraxay Madaxwaynaha Jamhuuriyadda Somaliland si xal looga gaadho arrintan culayskeeda leh madaxwaynaha jamhuuriyadda Somaliland, madaxwaynuhuna isaga oo fahansan muhiimadda iyo culayska hawshani leedahay waxa uu u saaray Guddi wasiiro ah oo uu hoggaaminayo Madaxweyne ku xigeenka Jamhuuriyadda Somaliland si ay baadhis iyo soo jeedin xal u noqon karta hawshan ay u keenaan. Kulamo is daba jog ah iyo baadhis ka dib, waxa ay guddidani soo jeediyeen in Hay'adda Shaqaalaha Dawladdu diiwaangaliso shaqaalahan si tiradooda dhabta ah loo sugo.

Haddaba si shaqaalahan tiradooda loo sugo, waxa ay Hay'adda Shaqaalaha Dawladdu u dirtay gobollada iyo dagmooyinka dalka oo dhan kooxo xog ururineed oo uu hoggaaminayo Agaasimaha guud ee Hay'adda Shaqaalaha Dawladda waxanay soo madax taabteen soona diiwaan geliyeen shaqaalihii ku meel gaadhka ahaa ee ku sugnaa xafiisyadda dawladda ee gobollada iyo degmooyinka dalka, waxana la sugay xogta diiwaangalinta shaqaalaha ku meel gaadhka ah iyo tirada wasaarad iyo hay'ad kasta ka hawlgasha, waxanay noqdeen sida shaxdan hoose ka muuqata:

| No | MDAs | Darajada A | Darajada B | Darajada C | Darajada D | Wadarta |
|---|---|---|---|---|---|---|
| 1 | Wasaaradda Arimaha Dibadda | 14 | 2 | 0 | 11 | 27 |
| 2 | Wasaaradda Arimaha Gudaha | 20 | 10 | 4 | 12 | 46 |
| 3 | Wasaaradda Qorshaynta Qaranka | 31 | 1 | 1 | 0 | 33 |
| 4 | Wasaaradda Gaadiidka iyo Horumarinta Jidadka | 51 | 15 | 1 | 38 | 105 |
| 5 | Wasaaradda Horumarinta Beeraha | 23 | 13 | 0 | 9 | 45 |
| 6 | Wasaaradda Gaashaandhiga | 39 | 10 | 1 | 2 | 52 |
| 7 | Wasaaradda Maalgashiga | 5 | 3 | 0 | 1 | 9 |
| 8 | Wasaaradda Dhalinyaradda iyo Ciyaaraha | 43 | 27 | 4 | 21 | 95 |
| 9 | Wasaaradda Horumarinta Khayraadka Biyaha | 49 | 6 | 2 | 8 | 65 |
| 10 | Wasaaradda Tamarta iyo Macdanta | 39 | 4 | 2 | 9 | 54 |
| 11 | Wasaaradda Xanaanada Xoolaha iyo Horumarinta Kaluumaysiga | 60 | 6 | 0 | 6 | 72 |
| 12 | Wasaaradda Diinta iyo Awqaafta | 23 | 12 | 1 | 8 | 44 |
| 13 | Wasaaradda Isgaadhsiinta iyo Tignolajiyadda | 19 | 4 | 0 | 2 | 25 |
| 14 | Hanti Dhawrka Guud ee Qaranka | 12 | 8 | 0 | 13 | 33 |

| No | MDAs | Darajada A | Darajada B | Darajada C | Darajada D | Wadarta |
|---|---|---|---|---|---|---|
| 15 | Komishanka Maamul Wanaaga iyo La dagaalanka Musuqmaasuga | 14 | 3 | 0 | 0 | 17 |
| 16 | Wasaaradda Deegaanka iyo Horumarinta Reermiyiga | 71 | 1 | 1 | 1 | 74 |
| 17 | Xafiiska Xuquuqul Iinsaanka Qaranka | 21 | 9 | 1 | 0 | 31 |
| 18 | Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Qaranka | 19 | 2 | 0 | 0 | 21 |
| 19 | Wasaaradda Ganacsiga Warshadaha iyo Dalxiiska | 33 | 11 | 2 | 1 | 47 |
| 20 | Wasaaradda Xidhiidhka Goloyaasha iyo Arimaha Dastuurka | 42 | 9 | 1 | 6 | 58 |
| 21 | Hay'adda Qaxoontiyadda iyo Barakacayaasha | 9 | 2 | 1 | 3 | 15 |
| 22 | Wasaaradda Hawlaha Guud, Dhulka iyo Guriyeynta | 47 | 12 | 1 | 5 | 65 |
| 23 | Hay'adda Dhawrista Tayadda | 17 | 2 | 0 | 8 | 27 |
| 24 | Hay’adda Shaqaalaha Dawladda | 9 | 0 | 0 | 0 | 9 |
| 25 | Wasaaradda Cadaaladda | 45 | 12 | 2 | 0 | 59 |
| 26 | Komishanka Qandaraasyadda Qaranka | 0 | 0 | 1 | 2 | 3 |
| 27 | Wasaaradda Shaqo Galinta iyo Arimaha Bulshada | 13 | 10 | 0 | 14 | 37 |
| 28 | Garsoorka | 70 | 0 | 0 | 0 | 70 |
| 29 | Wasaarada warfaafinta | 32 | 55 | 0 | 58 | 145 |
| 30 | Wasaarada Maaliyada | 92 | 38 | 2 | 29 | 161 |
| 31 | Xafiiksa Komishanka Qaranka ee Xakamaynta AIDS-KA | 48 | 13 | 5 | 0 | 66 |
| **Wadarta Guud** | | **1010** | **300** | **33** | **267** | **1610** |

***Xigasho: 2020, Waaxda Qorshaynta Statistikada***

*Waxa xusid mudan in aan Wasaaradaha Horumarinta Caafimaadka iyo Wasaaradda Waxbarashada iyo Sayniska aan sannadkan shaqaalaha ku meel gaadhka la diiwaangalin, isla markaana aan la sugin xogtooda.*



*Diiwaangelinta Shaqaalaha Ku Meel Gaadhka ah*


ELSAR


ELSAR


Jamhuuriyadda Somaliland
Republic of Somaliland
HAY'ADDA SHAQAALAHA DAWLADDA
Civil Service Commission
Xafiiska G/Sool


ELSAR
MEDIA PRODUCTION

## 3. TABABARRADA SHAQAALAHA WASAARADAHA IYO HAY'ADAHA DAWLADDA

Joogtaynta iyo fulinta tababarro joogto ah oo la siin ayo shaqaalaha dawladdu, waxa ay kor u qaadi kartaa heerka shaqo wanaagga shaqaalaha dawladda iyo bixinta adeeg tayadiisu sarrayso oo la siinayo muwaadiniinta qaranka Jamhuuriyadda Somaliland .

Haddaba, masuuliyiinta Hay'adda Shaqaalaha Dawladda oo ku baraarugsan muhiimadda tababarrada iyo in kor loo qaado koboca aqoontooda iyo xirfaddooda shaqo, waxa ay taabba geliyeen qorshayaasha tababarrada ee guud ahaan shaqaalaha dawladda.

### 3.1 TABABARRADA WAAXDA CUDUDDA SHAQAALAHA DAWLADDA

Waaxda horumarinta cududda shaqaalaha dawladda oo u qaabilsan Hay'adda Shaqaalaha Dawladda kobcinta aqoonta iyo xirfadaha shaqo ee guud ahaan shaqaalaha dawladda, isla markaana kaashanaysa waaxyaha kale ee Hay'adda Shaqaalaha Dawladda iyo mac-hadka tababaradda waxa ay sannadkan fulisay tababarro dhawr ah oo isugu jira qaar dhaadheer iyo kuwo gaagaaban oo ay shaqaaluhu ku kasbanayeen aqoon iyo xirfado kala duwan.
Faahfaahinta nooca tababarrada fulay iyo tirada shaqaalaha qaatay tababarradan iyo wasaaradihii iyo hay'adihii ay ka kala socdeen shaqaalahani waxa muujinaysa xogaha hoos ku xusan.

### 3.2 TABABARRADA INDHO-FURKA EE SHAQAALAHA CUSUB (INDUCTION TRAININGS)

Waaxda Horumarinta shaqaalaha ee Hay'adda Shaqaalaha Dawladdu iyada oo ka duulaysa masuuliyadaha iyo fulinta waajibaadka Hay'adda Shaqaalaha iyo xeerka shaqaalaha dawladda isla markaana kaashanaysa xafiisyada iyo waaxaha kala duwan ee Hay'adda Shaqaalaha Dawladdu ka koobantahay waxa ay sannadkan qaban qaabisay tababarro indho-fur ah oo la siinayo shaqaalaha cusub ee ku soo biiray shaqaale waynaha qaranka.

Tababarka noocan ah (Induction Training) waxa la siiyaa shaqaale kasta oo cusub isla markaana ku soo biiray shaqaale waynaha qaranka, waxana lagu baraa nidaamka dawladnimo iyo hadba wasaaradda ama hay'adda dawladeed ee uu ka shaqo galayaa waxa masuuliyadaheeda iyo waajibaadkeeda shaqo yahay, waaxyaha iyo xafiisyada ay u qaybsanto iyo sidoo kele xeerka shaqaalaha dawladda oo isagana lagu baraarujiyo iyada oo si cad loogu sheegayo waxa uu xeerkaasi farayo iyo waxa uu ka reebayaba.

Tirooyinka tababarrada noocan ah ee la bixiyay oo tiro badnaa waxan ka xusi karnaa dhawr tababar oo lasiiyey:

- ✓ Shaqaalihii cusbaa ee loo qaatay maamulka cusbitaalka wayn ee Hargeisa.
- ✓ Tababarkii la siiyay kooxdii labaad ee shaqaalaha barnaamijka hibada iyo hal-abuurka(TMP) ee loo qaatay wasaaradaha dawladda iyo
- ✓ Tababarradii la siiyay shaqaalihii cusbaa ee dawladda ku soo biiray sannadka 2020ka.



***Xigasho: 2020, Xil-wareejintii shaqaalaha cusub ee cusbitaalka guud ee Hargeysa***

## 3.3 TABABARRADA LA XIDHIIDHA QIIMAYNTA HAWL-QABADYADA

Qiimaynta hawl-qabadyada shaqaalaha dawladdu waa mid ka mid ah waajibaadka iyo shaqooyinka ugu muhiimsan ee ay qabato Hay'adda Shaqaalaha dawladdu, marka la qiimaynayo hawl-qabadyada shaqaalaha dawladda waa in marka hore ay jiraan qorshe iyo siyaasad cad oo dhigaysa qaabka loo marayo qiimaynta kartida hawl-qabad ee shaqaalaha dawladda.

Hadaaba, Hay'adda Shaqaalaha Dawladda oo kaashanaysa mashruuca dib u habaynta shaqaalaha dawladda ee ***Civil Service Streghtening Program (CSSP)*** waxa ay hanti iyo wakhti badan ku bixisay diyaarinta siyaasadaha lagu maamulayo shaqaale waynaha qaranka (HR Policies), siyaasadahaas oo ay ka mid tahay siyaasadda qiimaynta xayndaabka kartida shaqaalaha dawladda (Appraisal Performance Policy).

Siyaasadda qiimaynta kartida iyo hawl-qabadyada shaqaaluhu waxa ay u baahatay in waaxaha cududda shaqaalaha qaran si joogta loogu tababaro madaama ay ku cusubtahay, si hawshan natiijo wanaagsan looga gaadhana waaxda qiimaynta hawl-qabadyada shaqaalaha dawladda ee Hay'adda Shaqaalaha  Dawladdu waxa ay si wayn isaga xil saartay taabo-gelinta qorshaha qiimaynta kartida shaqaalaha dawladda oo ka mid ah waajibaadka ay u xilsaarantahay .

Waaxda qiimaynta hawl-qabadyada shaqaalaha ee Hay'adda Shaqaalaha  Dawladdu waxa ay tababarro joogta ah ku qabatay dhamaan xarumaha wasaaradaha iyo hay'adaha dawladda, tababarradaas oo ay qaateen dhamaan agaasimayaasha waaxaha iyo madaxa xafiisyada iyo hay'adaha dawladdu waxa lagu baranayey siyaasadda qiimaynta hawl-qabadyada shaqaalaha dawladda iyo qalabka loo isticmaalayo marka la samaynayo qiimayntaas.



***Xigasho: 2020, Tababarka waaxda qiimaynta shaqada iyo shaqaaluhu u qabatay wasaaradda Isgaadhsiinta iyo tiknoolijiyada***

Tababarradani waxa ay u fududeeyeen waaxaha cududda shaqaalaha in ay sameeyaan qiimaynta kartida iyo hawl-qabadyada hormooyinkii ugu horreeyay ee shaqaalaha dawladda, waxanay dhiirigaliyeen isla xisaabtan joogto ah iyo in qof walba lagu qiimeeyo dadaallada uu gaystay iyo hawl-qabadka uu sameeyey muddo cayiman.

Ugu dambayntiina waxa ay tababarradan joogtada ahi dhiirri geliyeen fahanka guud ee qorshaha qiimaynta kartida iyo hawl-qabadka shaqaalaha dawladda iyo qalabka (foomamka) loo isticmaalayo qiimayntan

## 3.4 TABABARRADA GAAGAABAN IYO KUWA DHAADHEER

Mac-hadka Shaqaalaha Dawladdu waa xarunta kor loogu qaado xirfadaha iyo aqoonta shaqaalaha dawladda si ay awood ugu yeeshaan bixinta adeeg hufan oo tayoleh. Iyada oo la siinayo waxbarasho tayoleh oo isugu jirta koorsooyin gaagaaban iyo Waxbarashada heerka koowaad iyo Labaad ee Jaamacadda.

Hiigsiga iyo himilada Mac-hadka shaqaalaha dawladdu waa in uu noqdo hormoodka Waxbarasho tayo leh, Cilmibaadhista iyo Adeeg bixinta. Himilooyinka iyo hiigsiga kele ee mac-hadku doonayo in uu ku tallaabsado mustaqbalka dhow waxa ka mid ah:

- Bixinta Waxbarasho tayo leh oo isugu jirta koorsooyin gaagaaban, qaar dhexe (Diploma), iyo Heerarka koowaad iyo Labaad ee Jaamacadda.
- Kor u qaadista iyo tayaynta adeegga cilmi-baadhista
- Ka taageeridda Xarumaha Dawladda samaynta siyaasadaha iyo tubaha horumarineed

Mac-hadka shaqaalaha dawladda waxa ka shaqeeya dhalinyaro iyo aqoonyahano da' yar oo u carban kaalinta iyo shaqada ay qaranka u hayaan. Shaxdan hoose waxa ay muujinaysaa faahfaahinta xogta shaqaalaha iyo maamulka Mac-hadka:

| | | Heerka Waxbarasho | | Jinsiga | |
|---|---|---|---|---|---|
| **Waaxda** | **Tiradda Shaqaalaha** | **Master** | **Bachelor** | **Rag** | **Dumar** |
| **Waxbarashada** | 18 | 12 | 6 | 13 | 5 |
| **ICT** | 4 | 2 | 2 | 4 | 0 |
| **Maamulka iyo Lacagta** | 12 | 5 | 7 | 5 | 7 |
| **Mamulka Sare** | 2 | 2 | 0 | 2 | 0 |
| **Wadarta Guud** | **36** | **21** | **15** | **24** | **12** |

***Xigasho: 2020, Mac-hadka shaqaalaha dawladda/Waaxda qorshaynta ee HSHD***

Mac-hadku waxa uu bixiyaa barnaamijyo waxbarasho oo kala duwan oo ay ka mid yihiin koorsooyin gaagaaban, barnaamijyada xirfad dhisidda, dibloomooyin iyo heerka koowaad sida:

- Xisaabaadka (Accounting)
- Maamulka Daawladda (Public Administration)
- Maaraynta Magaalooyinka (Urban Management)
- Maaraynta Horumarinta (Development Management)



***Xigasho: 2020, CSI, Tababarrada gaagaaban ee uu bixiyay mac-hadka shaqaalaha dawladdu***

Mac-hadku waxa uu bixiyaa shahaado Diploma ah oo la xidhiidha dhanka luuqadda Ingiriisida ah oo loogu talagalay in kor loogu qaado koboca luuqadda Ingiriisida ee shaqaalaha Dawladda, sannad kastana waxa ka baxa tiro shaqaale ah oo qaata kooraskan, sannadka 2020ka waxa Mac-hadka kooraskan ka qaatay shaqaale tiradoodu dhan tahay 44 qof, kuwaas oo faahfaahintoodu sidan tahay:

| Nooca tababarka | Goobta | Jinsiga | | Wadarta |
|---|---|---|---|---|
| | | Rag | Dumar | |
| English Language | Hargeisa | 18 | 27 | 45 |

***Xigasho: 2020, Mac-hadka shaqaalaha dawladda/Waaxda qorshaynta ee HSHD***

Koorsooyinka gaagaaban ee uu Mac-hadka shaqaalaha dawladdu sida joogtada ah u bixiyo waxa ka mid ah:

- ✓ Tababarka Cududda Shaqaalaha (Human Resource Management Training)
- ✓ Tababarka Qorshaynta iyo Maamulka Mashaariicda (Project Planning and Management Training)
- ✓ Maamulka Xafiisyada (Office Administration)

- ✓ Xisaabaadka iyo Iibka (Finance, Budget and Procurement Training)
- ✓ Hoggaaminta (Leadership and Change Management Training)
- ✓ Tababarrada Tignoolojiyada (ICT Trainings)

Tababarradan gaagaaban waxa sannadka 2020ka ka faa'idaystay shaqaale dawladeed oo ka kala socday wasaaradaha iyo hay'adaha dawladda, waana tababarro xirfad dhisid ah oo qofka lagu tababarayo sidii xirfaddiisa shaqo kor loogu qaadi lahaa, shaxdan hoose waxa ay muujinaysaa tirada labka iyo dheddigga ah ee tababarradan qaatay:

| S/N | Nooca Tababarka | Goobta | Jinsiga | | Wadarta |
|---|---|---|---|---|---|
| | | | **Lab** | **Dhadig** | |
| **1.** | Leadership & Change management | Hargeisa | 8 | 6 | **14** |
| **2.** | Asset Management | Hargeisa | 20 | 16 | **36** |
| **3.** | Office Administration | Hargeisa | 11 | 13 | **24** |
| **4.** | Office Administration | Burco | 17 | 13 | **30** |
| **5.** | Computer Driving License | Hargeisa | 9 | 3 | **12** |
| 6. | Public Procurement | Hargeisa | 12 | 8 | **20** |
| 7. | Work Ethics | Hargeisa | 4 | 5 | **9** |
| 8. | Human Resource Management | Hargeisa | 13 | 8 | **21** |
| 9. | Project Planning | Hargeisa | 20 | 10 | **30** |
| 10. | Result Based Management | Burco | 26 | 2 | **28** |
| **Total** | | | **140** | **84** | **224** |

***Xigasho: 2020, Mac-hadka shaqaalaha dawladda/Waaxda qorshaynta ee HSHD***

Waxa xusid mudan in wadarta guud ee dadka tababarradan qaatay sannadka 2020ka ay ahayd **440 qof** oo isugu jiray shaqaale dawladdeed oo tiradoodu dhan tahay **224 shaqaale,** iyo kuwo ay soo dirsadeen shirkadaha gaarka loo leeyay ama si shakhsi ah u soo codsaday tababarradan oo iyagana tiradoodu dhan tahay **216 qof**.

Sidoo kele ardayda sannadkan 2020 ka qalin-jebisay barnaamijka heerka koowaad ee waxbarashada jaamacadda (Bacholar Degree), waxa ay tiradooda guud dhamayd 171 qof oo isugu jiray rag iyo dumarba, shaxda hoose waxa ay tilmaamaysaa faahfaahinta noocyada shahaadada ay dhamaysteen iyo tirada dhamaysatay shahaado kasta sidan soo socota:

| S/N | Nooca Degreega ay dhamaysteen | Goobta | Jinsiga | | Tiradda Guud |
|---|---|---|---|---|---|
| | | | Lab | Dhadig | |
| **1.** | Accounting | Hargeisa | 32 | 9 | **41** |
| **2.** | Development Management | Hargeisa | 38 | 13 | **51** |
| **3.** | Public Administration | Hargeisa | 35 | 12 | **47** |
| **4.** | Urban Management | Hargeisa | 28 | 4 | **32** |
| **Total** | | | **133** | **38** | **171** |

*Xigasho: 2020, Mac-hadka shaqaalaha dawladda/Waaxda qorshaynta ee HSHD*




***Xigasho: 2020, Mac-hadka shaqaalaha dawladda/qalinjabintii ardayda Mac-hadka ee sannadka 2020ka***

Sidoo kele waxa jira arday ku kala jirta kulliyadaha kala duwan ee mac-hadka kuwaas oo maraya heerar kala duwan. Shaxda hoose ayaana muujinaysa faah-faahinta xogta kulliyadaha ay ku kala jiraan, tiradooda iyo jinsiga ay yihiin:

| **S/N** | **Kuliyadaha/Nooca tababarka** | **Sannadka 1aad** | | **Sannadka 2aad** | | **Sannadka 3aad** | | **Tiradda Guud** |
|---|---|---|---|---|---|---|---|---|
| | | Lab | Dhadig | Lab | Dhadig | Lab | Dhadig | |
| **1.** | Accounting | 56 | 14 | 32 | 13 | 49 | 10 | **174** |
| **2.** | Development Management | 48 | 14 | 26 | 11 | 29 | 10 | **136** |
| **3.** | Public Administration | 47 | 14 | 50 | 11 | 32 | 7 | **161** |
| **4.** | Urban Management | 30 | 8 | 30 | 1 | 22 | 3 | **94** |
| **Wadarta ardayda ee kuliyad kasta** | | 181 | 50 | 138 | 36 | 132 | 30 | **567** |
| **Wadarta ardayda ee sannad lahaa** | | 231 | | 174 | | 162 | | **567** |

***Xigasho: 2020, Mac-hadka shaqaalaha dawladda/Waaxda qorshaynta ee HSHD***

## 4. DARAASADAHA IYO CILMI BAADHISTA LA DIYAARIYEY

Samaynta cilmi baadhisyo iyo daraasado la xidhiidha horumarinta iyo koboca shaqaalaha dawladda ee dhinacyada aqoonta, caafimaadka iyo guud ahaan kaabayaasha nolosha shaqaalaha dawladdu waa mudnaanaha koowaad iyo dadaallada ugu horreeya ee ay Hay'adda Shaqaalaha Dawladdu ku baadi goobayso in la helo shaqaale ka dhisan dhan walba oo qarankooda ka helay ama kasbaday waxii ay ka mudnaayeen.

Daraasadahani waxa ay halbeeg iyo tusaalayn u yihiin dadaallada ay Hay'adda Shaqaalaha Dawladdu ugu jirto in shaqaalaha dawladdu helaan adeeg caafimaad oo jaban, adeeg waxbarasho oo lacag la'aan ah iyo qaab nololeed dheeli tiran oo ku sar go'an manfaca iyo dheefta ay qarankooda ka helayaan.

Hadaba, daraasaddaha iyo cilmi baadhista ay hay'adda shaqaaluhu sannadkan 2020ka hirgalisay waxa ka mid ah daraasadda la xidhiidha adeegga caafmaadka shaqaalaha dawladda iyo daraasadda la xidhiidha qaab-dhismeedka wasaaradaha iyo hay'adda dawladda sida aanu hoos ku faahfaahinay.

### 4.1 DARAASADDA CAAFIMAADKA SHAQAALAHA DAWLADDA

30 September 2020ka, Guddoomiyaha Hay'adda Shaqaalaha Dawladda mudane Farxaan Aadan Haybe ayaa markii ugu horaysay ka daah-furay daraasad iyo cilmi baadhis ku saabsan sidii ay shaqaalaha dawladdu u heli lahaayeen adeegyo caafimaad oo hayntooda iyo dheefta ay qarankan ka helaan ku sar go'an.

Munaasabadda lagu daah-furayey cilmi baadhistan ayaa waxa ka soo qayb galay saraakiisha wasaaradda caafimaadka, hay'ado caalamiy ah, jaamacadaha iyo laamaha caafimaadka ee dalka oo dhan, dhamaantoodna waxa ay soo jeedinayeen dariiqyada ugu sahlan ee loo mari karo in shaqaalaha dawladdu helaan adeegyo caafimaad oo tayo leh isla markaana u qalma hayntooda.

Masuuliyiintii iyo xirfadlayaashii caafimaad ee ka soo qayb galay xafladda daah-furka daraasaddani waxa ay dhamaantood ku amaaneen Hay'adda Shaqaalaha Dawladda samaynta daraasaddan iyo koboca horumerineed ee dhanka shaqada iyo shaqaalaha ee ay Hay'adda Shaqaalaha Dawladdu samaynayso muddooyinkii ugu dambeeyay.

Gebagebadii xafladda daah-furka daraasadda waxa ay masuuliyiinta Mac-hadka shaqaalaha dawladda oo horkacaya samaynta daraasaddani soo bandhigeen warbixin ka hadlaysa dariiqyada ugu habboon ee loo mari karo hirgelinta daraasaddan, iyaga oo tusaale ahaan u soo qaatay qaar ka mid ah waddamada dunida oo hirgaliyey daraasaddan.




***Xigasho: 2020 HSHD, Guddoomiyaha Hay'adda Shaqaalaha Dawladda oo ka qayb galay xafladda daahfurka daraasadda caafimaadka shaqaalaha***

## 4.2 QAAB-DHISMEEDKA WASAARADAHA

Jaangoynta qaab-dhismeedka shaqo (Strucural Chart) ee wasaaradaha iyo hay'adaha dawladdu waxa ay muhiim u tahay gaadhista iyo dhamaystirka waajibaadka shaqo iyo in laga dhabeeyo yoolasha iyo hiigsiga u calaamadsan wasaarad iyo hay'ad kasta oo ka mid ah hay'adaha qaranka. Sannadkii hore ee 2019ka Hay'adda Shaqaalaha Dawladda oo kaashanaysa la taliye caalami ah oo ku takhasusay samaynta iyo diyaarinta qaab-dhismeedka hay'adaha dawliga ah waxa uu qiimayn la xidhiidha qalfoofka iyo qaab-dhismeedka shaqo ka sameeyeey 18 wasaaradood iyo hay'adood oo dawladda ah. Waxa uu khabiirkaasi qiimeeyay qaabka ay wasaarad kastaa u jirto waxanu wasaarad kasta ka diyaariyay Buug-yare koobaya dhamaan xogta la xidhiidha wasaaraddaas iyo xirfadaha iyo aqoonta shaqaalaha wasaaraddaas ka shaqeeya.

Qiimaynta qaab-dhismeedka wasaarad kasta waxa ka soo baxay in dib loo habeeyo waaxyaha wasaaraddaas iyo qaybaha ay guud ahaan ka kooban tahay, waxaana wasaarad kasta oo ka mid ah 18 kaa wasaaradood lagu sameeyay qaab-dhismeed cusub oo la jaanqaadaya shaqada ay wasaaraddaasi qabato iyo waxa ay u taagan tahay. Sidoo kele dhamaan masuuliyiinta wasaarad kasta waxa loo diyaariyay shaqo qeexyada kaalmaha shaqo (Job Discriptions) iyo masuul kasta oo kaalin ka haya qaab dhismeedka wasaraddaas.

Haddaba, sannadka 2020ka Hay'adda Shaqaalaha Dawladda gaar ahaan qaybta curinta qaab-dhismeedka wasaaradaha iyo hay'adaha dawladda oo kaashanaysa waaxda qorshaynta ee Hay'adda Shaqaalaha Dawladdu waxa ay soo sameeyeen daraasad la xidhiidha koboca shaqa

wanaagga ee ay keeneen qaab-dhismeeddadii cusbaa ee loo sameeyay wasaaradahaas iyo hay'adahaa aynu kor ku soo sheegnay. Sidoo kele, waxa ay Hay'adda Shaqaalaha Dawladdu diyaar u tahay in daraasaddan ka dib wasaaradaha iyo hay'adaha dawladda ee aan loo samayn qaab-dhismeedka shaqo loo sameeyo sannadka 2021ka.

## 4.3 BARNAAMIJKA HAWL-GABKA SHAQAALAHA DAWLADDA

Xafiiska Hawl-gabka iyo Xaqsiinta shaqaalaha dawladda waxa la aasaasay sannadkii 2011kii, waajibaadka xafiiskani waa in uu masuul ka noqdo dadka waayeelka ah ee gaadhay da'da hawl-gabka ee xafiisyada dawladda ka shaqeynayay muddooyinkii ay tamarta iyo xooga lahaayeen hadase talax gabay oo aan sii wadi karin shaqadii ay qaranka u hayeen.

Sidoo kele waajibaadka shaqo ee xafiiskan hawl-gabka iyo xaqsiinta waxa ka mid ah in uu diyaariyo xuquuqda shaqaalaha geeriyooday ee dawladda u shaqaynayay, si eheladda dadkaasi ka geeriyoodeen loo siiyo wixii uu xuquuq ka helayo dawladda shaqaalahaas geeriyooday iyada oo la waafajinayo sharciga shaqaalaha dawladda ee xeer Lr.7/96 iyo siyaasadda qaran ee hawl-gabka iyo xaqsiinta shaqaalaha qaranka.




***Xigasho: 2020, Shirkii Wada tashiga Xeerka iyo Siyaasadda Hawl-gabka qaranka***

Waajibaadka kale ee xafiiska hawl-gabka iyo xaqsiinta waxa ka mid ah hubinta iyo in uu xaqsiintooda u diyaariyo shaqaalaha si iskood ah uga tegey shaqada dawladda, kuwa la ruqseeyay iyo kuwa ay heshiisyada shaqo ka dhamaadeenba, iyada oo laga xisaabinayo sannadaha iyo

wakhtiga ay dawladda u shaqaynayeen si waafaqsan sharciga shaqaaalaha dawladda. Ujeedooyinka kale ee loo asaasay xafiiskan waxa sidoo kele ka mid ah sidii loo kaabi lahaa dhaqaale ahaan shaqaalaha dawladda si aanay u gelin xaalad nololeed iyo mid duruufeed oo adag iyaga iyo qoyskooduba, maadaama ay qaranka u shaqaynayeen intii ay kartida iyo awoodda shaqo lahaayeen, markanna ay waajib qaranka ku tahay in uu xannaaneeyo iyaga iyo qoysaskoodaba.

Xafiiskani waxa uu hadda gacanta ku hayaa shaqaale hawl-gab ah oo tiradoodu dhan tahay **297** qof oo ka kala yimid dhamaan wasaaradaha iyo hay'adaha Dawladda oo isugu jira rag iyo dumar talax-gabay oo ka qaata qoondo lacageed loogu talo galay xanaanadooda, iyaga oo ku qaata darajooyinka A, B, C & D. Lacagta qoondada ah ee ay qof ahaan u qaataana ay ku xidhantahay qof walba derajadiisa, taas oo ku cad xoqtiisii shakhsiga ahayd markii uu shaqaalaha ahaa.

Sannadka 2020ka, waxa uu xafiisku xaq siin u sameeyey shaqaale hore oo tiradoodu dhan tahay **47** qof isuguna jira rag iyo dumar kana kooban dhamaan derejooyinka A, B, C & D, waxaanay guud ahaan xaqsiintoodu u kala baxaysay saddex nooc oo kala ah, shaqaale dhintay lana siiyey xaqsiin eheladoodii ka dib markii ay maxkamadi u soo caddaysay, shaqaale si iskood ah shaqada uga tegey, iyo shaqaale shaqada looga saaray sifo sharciga waafaqsan ama la ruqseeyay. Faahfaahinta xogtanina waxa ay ka muuqataa shaxdan hoose:

| Wasaaraddaha/Hay'addaha | Darajada A | Darajada B | Darajada C | Darajada D | Sababaha | | Wadarta Guud |
|---|---|---|---|---|---|---|---|
| | | | | | Dhimasho | Shaqo ka Tagis | |
| Wasaaradda Horumarinta Biyaha | | 1 | 4 | | 5 | | 5 |
| Wasaaradda Xidhiidhka Golayaasha & Arimaha Dastuurka | 1 | | 1 | | 1 | 1 | 2 |
| Wasaaradda Diinta Iyo Awqaafta | 2 | | | | 1 | 1 | 2 |
| Wasaaradda Waxbarashadda & Sayniska | 2 | 1 | | | | 3 | 3 |
| Wasaaradda Isgaadhsiinta & Tiknolajiyadda | | 2 | | | 1 | 1 | 2 |
| Wasaaradda Cadaaladda | 1 | | | | | 1 | 1 |
| Gudida Qandaraasyadda Qaranka | 1 | | | | | 1 | 1 |
| Hay'adda Duulista & Madaaradda | | | 3 | 3 | 6 | | 6 |
| Wasaaradda Tamarta & Macdanta | 2 | 1 | | | 3 | | 3 |
| Wasaaradda Xanaanadda Xoolaha & H.Kaluumaysiga | 2 | | | | 1 | 1 | 2 |
| Maxkamadaha | 1 | 2 | | | | 3 | 3 |

| Wasaaraddaha/Hay'addaha | Darajada A | Darajada B | Darajada C | Darajada D | Sababaha | | Wadarta Guud |
|---|---|---|---|---|---|---|---|
| | | | | | Dhimasho | Shaqo ka Tagis | |
| Wasaaradda Shaqo-galinta & Arimaha Bulshada | | | 1 | | 1 | | 1 |
| Wasaaradda Gaashaandhiga | 1 | 1 | 1 | | 1 | 2 | 3 |
| Wasaaradda Ganacsiga, Warshadaha & Dalxiiska | 1 | | | | | 1 | 1 |
| Wasaaradda Horumarinta Caafimaadka | | | | 1 | | 1 | 1 |
| Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka | | 1 | 2 | 2 | | 5 | 5 |
| Xafiiska Madaxtooyadda | 1 | | | | | 1 | 1 |
| Hay'adda Shaqaalaha Dawladda | | | 1 | | | 1 | 1 |
| Wasaaradda Horumarinta Beeraha | | 1 | | | | 1 | 1 |
| Xafiiska Hanti Dhawraha Guud ee Qaranka | 1 | | | | 1 | | 1 |
| Wasaaradda Arimaha Dibadda | 1 | | | | | 1 | 1 |
| Hay'adda Qaxoontiyadda & Barakacayaasha | 1 | | | | 1 | | 1 |
| | **18** | **10** | **13** | **6** | **22** | **25** | **47** |

***Xigasho: 2020, Waaxda Qorshaynta Xafiiska Statistikada/Xafiiska Xaqsiinta***

Sida ka muuqata faahfaahinta xogta ay bixinayso shaxda sare, tirada shaqaalaha geeriyooday ee xuquuqdoodii la siiyay dhaxlayaashii ka dib markii ay maxkamadi u caddaysay waxa ay dhamaayeen sannadka 2020ka **22-qof** oo qaranka ugu shaqayn jiray darajooyinka kala duwan halka tiro dhan **25-qof** ay si iskood ah shaqadda uga tageen ama la ruqseeyay, iyada oo wadar ahaanna ay noqonayaan **47-qof** oo ka kala socday **22** wasaaradood iyo hay'adood.

Ugu dambayn, xafiiska hawl-gabka iyo xaqsiintu waxa uu sameeyaa xaqsiinta sannadkii afar jeer oo kala ah Rubuca Koowaad oo ka kooban bilaha (*January, Feberwary iyo March*), Rubuca Labaad oo ka kooban bilaha (*April, May iyo June)*, Rubuca Saddexaad oo ka kooban bilaha (*July, August iyo September*) iyo Rubuca Afraad oo ka kooban bilaha (*October, November iyo December*), hawl-gabakana waxa sannadkii xaqooda loo siiyaa si bille ah.

## 4.3.1 QORSHAHA HORUMARINTA HAWL-GABKA QARANKA

Qorshaha Horumarinta Hawl-gabka Shaqaalaha Qaranka ayaa laga yagleelay Hay'adda Shaqaalaha Dawladda iyada oo loogu magac daray qorshahan (**Hayaanka Qorshaha Hawl-gabka Shaqaalaha Qaranka**). Dhamaystirka qorshahani hada waxa uu ku dhaw yahay gebogebo, waxaana hadda socda qorshihii lagu hirgelin lahaa sannadkan fooda innagu soo haya ee 2021ka. Siyaasadda iyo xeerka hawl-gabka shaqaalaha qaranka ayaa iyaduna qorshaysan in sannadkan soo socda horraantiisaba la horgeeyo Golaha Wasiirrada si ay uga doodaan, ka dibna loogu gudbiyo Golaha Wakiillada JSL.




***Xigasho: 2020, Shirkii Wada tashiga Xeerka iyo Siyaasadda Hawl-gabka qaranka***

Si siyaasadda iyo xeerka hawl-gabka qaranka u noqdaan kuwo la jaanqaadi kara waaqaca iyo hab dhaqanka siyaasadeed ee dalkeenna waxa la sameeyay daraasad cilmi baadhiseed oo ka horraysay iyo kulamo joogto ah oo lala yeeshay daneeyayaasha qorshaha hayaanka hawl-gabka qaranka si xogo iyo afkaaro kala duwan oo mug leh looga helo, iyada oo daraasadahan lagu ogaaday in siyaasadda iyo xeerka hawl-gabku qiimo wayn u leeyahay guud ahaan shaqaale weynaha qaranka.

Waxa safarro dibadeed loo galay sidii aqoon iyo fahan dheeriya looga kasban lahaa qaabka ay u shaqeeyaan hawl-gabka shaqaalaha ee qaar ka mid ah dawladaha jaarka ah, waxa la

qabtay doodo iyo kulanno is daba joog aha oo lagu bixiyay wakhti badan si xal loogu helo siyaasad iyo xeer lagu maamulo shaqaalaha hawl-gaba ee qaranka uga baahan dheef ay xilligaa ku naalloodaan.



***Xigasho: 2020, Guddoomiyaha Hay'adda Shaqaalaha Dawladda iyo wasiirrada maaliyadda iyo qoyska oo shir ku saabsan arrimaha hawl-gabka shaqaalaha Somaliland kaga qaybgalay Nairobi, Kenya***

Qorshaha hayaanka hawl-gabka qaranku waa nidaam dhigaal loogu samaynayo shaqaalaha inta ay ku jiraan xilliga shaqada. Qorshahan waxa mushaharka shaqaalaha laga goynayaa qaddar lacageed oo dhan boqolkiiba saddex (3%) waxaanay dhigaal iyo kayd u noqon doontaa mustaqbalka marka ay hawl-gabaan, sidoo kele qaddar lacageed oo dhan boqolkiiba todoba (7%) ayay dawladdu ku biirin doontaa dhigaalkan hawl-gabka shaqaalaha sida ku cad xeerka qabyo-qoraalka ah ee hawl-gabka. Waxa sidoo kele uu xeerkani qorayaa in haddii qofku geeriyoodo isaga oo ku jira hawl-gab loo sii wadi doono ubadkiisa yaryar ilaa ay ka gaadhayaan heerka qaangaadhnimada ama ay isku filnaanayaan. Waxa kele oo xeerkan ku jira in qofka ragga ahi ku noqonayo hawl-gab marka uu gaadho da'da 65, qofka dumarka ahina ay da'deedu gaadho 60 jir.

Ugu dambayn, hirgelinta qorshaha hayaanka hawl-gabka qaranka ayaa la rajaynayaa in bilowga sannadka cusub ee 2021 la daah-furo iyada oo loo diyaariyay miisaaniyad sannadeedkii, dhismihii iyo goobtii lagu shaqayn lahaa iyo waliba shaqaalihii hirgalinta iyo fulinta barnaamijkan ka shaqayn lahaa, waxaana barnaamijkan si wayn ugu dheg taagaya bulsho waynta Somaliland , shaqaalaha dawladda iyo guud ahaan daneeyayaasha barnaamijkan.



*Xigasho: 2020, Shirkii Wada tashiga Xeerka iyo Siyaasadda Hawl-gabka qaranka*




*Xigasho: 2020, Shirkii Wada tashiga Xeerka iyo Siyaasadda Hawl-gabka qaranka*

## 4.4 HIRGELINTA BARNAAMIJKA E-SHILING

Barnaamijka E-Shiling oo ah barnaamij shaqaalaha dawladdu mushaharooyinkooda ku qaadanayaan qaab casri (online) ah iyaga oo ku sugan goobahooda shaqo ama guryahooda ayaa isna sannadka 2020ka ka hirgalay dalka, iyada oo dhamaan shaqaalaha wasaaradaha iyo hay'adaha dawladda intooda badani sannadkan ay u heleen ama mushaharkoodu u gaadhay qaabkii ugu habboonaa ee waafaqsanaa sharciga shaqaalaha iyo nidaamka mushahar bixinta ee saxda ah.

Sannaddadii 2018 iyo 2019kii ayaa masuuliyiinta iyo hawl wadeennada hay'adda shaqaalaha dawladdu kormeerro iyo xog-waraysi joogto ah ku tagayeen dhamaanba gobollada iyo degmooyinka dalka iyaga oo xataa gaadhay tuulooyinka iyo dagmooyinka fog-fog ee dalka. Kormeerradan waxa xog waraysi mug leh lala yeeshay shaqaalaha ku sugan goobahaas iyada oo lagu ogaaday daruufo kala duwan oo ay ka mid ahaayeen in aan mushaharka dawladdu shaqaalahaas si habboon u gaadhin ama ay dhib wayn ku qabaan sida iyo qaabka ay mushaharooyinkooda u helaan.

Haddaba, saraakiisha Hay'adda Shaqaalaha Dawladda oo arrintaas ka dareen celiyey ayaa waxa ay isugu yimaadeen kulamo joogto ah oo lagu darsaayo qaabka iyo habka ugu haboon ee shaqaalahaas loo gaadhsiin karo xaddiga mushaharooyinkooda oo sax ah, waana markan marka hindisaha barnaamijkani ka imanayo Hay'adda Shaqaalaha Dawladda iyada oo markiiba la isla gartay in lala kaashado Baanka dhexe ee JSL iyo Wasaaradda Maaliyadda JSL. Isla markiiba waxa ay saraakiisha hay'adda shaqaaluhu kulamo la qaateen Guddoomiyaha iyo Agaasimaha Baanka dhexe ee JSL, iyada oo masuuliyiinta baankuna ay ku qanceen muhiimadda uu barnaamijkani u leeyahay guud ahaan shaqaalaha iyo arrimaha la xidhiidha dhaqaalaha.

Barnaamijkani waxa uu noqday barnaamij hawlo badan koobsaday, wax waynna ka qabtay ilaalinta iyo kor joogtaynta shaqaalaha mushaharooyinka dawladda qaadanaya, isaga oo Hay'adda Shaqaalahana ka caawiyey ilaalinta xogaha shaqaalaha mushaharooyinkaas qaadanaya iyo ka hortagga caaglaysiga (ghost workers) iyo in aan lacag caddaan ah loo keenin goobaha shaqada si aanay u iman xatooyo shaqaale iyo lunsi mushahar.

Sidoo kele, barnaamijkani waxa uu wax wayn ka taray yaraynta sicir bebararka iyada oo shaqaalihii dawladda ee hal mar galin jiray suuqa xaddi fara badan oo noodhka shilingka Somaliland ah, sababna u noqon jirtay in xilliyada mushaharooyinka la qaato doollarku samayn jiray kor u kac, noodhka shillinkuna suuqa ku badan jiray, haddase qof kasta oo shaqaale ahi waxa uu xisaab ku yeeshay baanka dhexe ee JSL, waxaanuu marba inta uu isticmaalayo kala soo baxaa xisaabtiisa isaga oo adeegsanaya taleefankiisa gacanta iyo shirkadaha isgaadhsiinta ee dalka, sidaana waxa ku yaraaday xaddigii faraha badnaa ee noodhka shilinka Somaliland ee suuqa sida wayn mar qudha u gelayay.

Barnaamijkan waxa markii hore loogu tijaabiyey shaqaalaha Hay'adda Shaqaalaha Dawladda , wasaaradda maaliyadda iyo shaqaalaha laamaha garsoorka iyo caddaaladda, sida shaqaalaha

wasaaradda cadaaladda iyo shaqaalaha maxkamadaha dalka, balse hadda waxa mushaharooyinkooda ku hela nidaamkan dhammaanba shaqaalaha wasaaradaha iyo hay'adaha dawladda marka laga reebo qaar kooban oo ay qorshaysan tahay in inta sannadka ka hadhsan lagu soo daro hadii Alle idmo.

## 5. WAX KA BEDDELKA HAB MAAMULKA XAFIISYADA

Waxa dib u habayn balaadhan lagu sameeyay hababka shaqada iyo qeexidda masuuliyadaha shaqaalaha hay'adda ee ka hawlgala xarunta guud. Sidoo kele waxa dib u eegis iyo dib u habayn lagu sameeyay qaab-dhismeedka hay'adda guud ahaan iyada oo lagu soo kordhiyay waaxda ICT ga, isla markaana qalabayn ballaadhan lagu sameeyay dhamaan xafiisyada xarunta ee Hay'adda si shaqada iyo adeegga la bixiyaa u noqdo mid u cuntama shacabka una hirgala sidii loo rabay in uu u socdo. Si kooban waxa aannu halkan hoose ugu soo gudbinaynaa meelaha is beddelka ballaadhan lagu sameeyay.

### 5.1 SAMAYNTA XAFIISKA KAYDKA XOGTA SHAQAALAHA DAWLADDA (CIVIL SERVICE EMPLOYEE ARCHIVE)

**09th july 2020,** waxa xarunta Hay'adda Shaqaalaha Dawladda ka qabsoontay xafladda daah-furka xafiiska kaydka xogta shaqaalaha dawladda (Civil Service Employee Archive). Maalintaasi waxa ay Hay'adda Shaqaalaha Dawladda u ahayd mid taarikhi ah oo ay rumowday riyo ka mid ah riyooyinka inta badan la sugayay in ay hirgalaan**.** Xafiiska kaydka xogta shaqaalaha dawladda oo muhiim u ah kaydinta xogta shaqaalaha dawladda waxa loo xulay shaqaale firfircoon isla marakana waayo arag ku ah kaydinta xogta shaqaalaha dawladda.

Maalmo kooban ka dibna waxa xafiiskan loo sameeyay nidaamka iyo habka kaydinta xogta shaqaalaha dawladda (Archive filling system and database), waxaana qaab habboon loogu kaydiyey faylasha shaqaalaha wasaarado iyo hay'ado dhowr ah oo lagu bilaabay halka wasaaradaha iyo hay'adaha dawladda ee hadhsanna la rajaynayo in ay soo dhamaystiraan oo ay ku soo xareeyaan xafiiska faylasha shaqaalahooda.

Tirada ku kaydsan faylasha xafiiskan ee ilaa hadda soo gaadhay waxa ay dhan tahay **1306 fayl,** iyada oo la rajaynayo in dhamaan shaqaalaha dawladdu ku yeeshaan fayl dhamaystiran oo sharraxaya xogaha shaqsiga ah ee qofka shaqaalaha ah, haddii uu abaal marino dhanka shaqada ah helay, haddii uu digniino helay iyo caddaymaha shahaadooynkiisa waxbarasho. Waxyaalaha kele ee intii uu xafiiskani jiray u qabsoomayna waxa ka mida;

- Diyaarinta qorshaha maamul ee faylasha iyo xogta shaqaalaha dawladda (Database).
- Diyaarinta iyo dejinta xogta iyo ku jirayaasha uu ka koobnaan doono faylka shaqaalaha dawladdu (personal file contents).
- La xisaabtanka shaqaalaha iyo agaasimayaasha waaxaha cududda shaqaalaha si loo dhamaysiro xogta shakhsiga (personal files) ah ee shaqaalaha dawladda.

- Diyaarinta qaabka iyo qorshaha xoguhu u soo gelayaan ama uga baxayaan xafiiska arkiifiyada (Recording System) iyo shaqooyin kele.



***Xigasho: 2020, HSHD, Guddoomiyaha Hay'adda Shaqaalaha Dawladda oo xadhigga ka jaraya xafiiska kaydka xogta shaqaalaha dawladda***







***Xigasho: 2020, HSHD,Xafladdii furitaanka xafiiska kaydka xogta shaqaalaha***

## 5.2 SAMAYNTA IYO XOOJINTA WAAXDA CUDUDDA SHAQAALAHA DAWLADDA

Hay'adda Shaqaalaha  Dawladdu waxa ay dadaal xoog leh galisay waaxda cududda shaqaalaha ee dhamaan wasaaradaha iyo hay'adaha dawladda. Waaxdani waxa ay laf dhabar u tahay horumarinta shaqaalaha dawladda, tayaynta adeegga, diyaarinta xogaha shaqaalaha dawladda, ilaalinta xuquuqdooda iyo dardar gelinta shaqooyinka guud ee shaqaaluhu hayaan.

Waaxda cududda shaqaaluhu waxa ay inta badan wasaaradaha iyo hay'adaha dawladda hoos tagi jirtay waaxda maamulka iyo lacagta, inta badanna may lahayn xafiisyo u gaara iyo shaqooyin joogto ah, manay lahayn siyaasado iyo hab-raacyo maamul oo ay u raacaan hab-maamulka shaqaalaha waxaana haystay caqabado waawayn oo diciifiyay maaraynta hawl-qabadyada shaqaalaha dawladda iyo cabbirka kartida shaqo iyo kala sarraynta dadaallada ay shaqaaluhu samaynayaan, taasina waxa ay abuurtay niyad jab dhanka dallacaadaha shaqada ah.

Haddaba Hay'adda Shaqaalaha  Dawladda  oo dareensan muhiimadda ay waaxdani u leedahay guud ahaan qaranka waxa ay ugu horayn soo jeedisay in wasaarad iyo hay'ad kastaa yeelato waaxda cududda shaqaalaha, waxaana isla wakhtigaa la abuuray waaxda cududda shaqaalaha ee wasaarad iyo hay'ad kasta, waxa la xoojiyay xirfadaha shaqo ee agaasimayaasha waaxaha cududda shaqaalaha iyada oo la siiyay tababarro isdaba joog ah oo lagu tababarayay hab-maamulka shaqaalaha, siyaasadaha iyo xeerarka maamulka shaqaalaha (HR policies), samaynta shaqo qeexyada shakhsiga (job descriptions) iyo sidoo kele dabagalka iyo cabirka kartida hawl-qabadyada shaqaalaha dawladda (Performance monitoring).

Sidoo kele Hay'adda Shaqaalaha  Dawladda  oo caawimo ka helaysa mashruuca dib u habaynta shaqaalaha dawladda ee CSSP, waxa ay waaxaha cududda shaqaalaha ee wasaaradaha qaar oo muujiyey dedaal iyo la shaqayn wanaagsan oo Hay'adda Shaqaalaha  Dawladda  ah la siiyay qalab xafiiseed ay u isticmaalaan shaqooyinkooda joogtada ah.

Intii la xoojiyey waaxaha cududda shaqaalaha ka dib, xogaha iyo baadhitaannada ay Hay'adda Shaqaalaha  Dawladdu samaysay waxa ay muujinayaan in uu jiro koboc iyo kor u kac dhanka maamulka shaqaalaha ah, waxa sidoo kele kor u kacay heerka la xisaabtanka shaqaalaha iyo kaydinta xogaha shaqaalaha oo la horumariyay. Hay'adda Shaqaalaha  Dawladdu waxa ay ku dadaalaysaa in la sii horumariyo waaxaha cududda shaqaalaha dawladda, siyaasadaha iyo nidaamyada ay u isticmaalayaan hab-maamulka shaqaalahana la sii horumariyo.



***Xigasho: 2020, HSHD, Guddoomiyaha Hay'adda Shaqaalaha  Dawladda  oo tababar u soo xidhay Agaasimayaasha waaxyaha cududda shaqaalaha ee wasaaradaha iyo hay'adaha dawladda***

## 5.3 SAMAYNTA WAAXDA ICT EE GUUD AHAAN WASAARADAHA IYO HAY'ADAHA DAWLADDA

Hay'adda Shaqaalaha  Dawladdu waxa ay sannadka 2020ka aasaastay ama ku soo kordhisay qaab-dhismeedka wasaaradaha iyo hay'adaha dawladda waaxda ICTga. Aasaasidda waaxdani waxa ay ku timi soo jeedin ka timi Wasaaradda Isgaadhsiinta iyo Tignoolajiyadda, waxaanay soo jeedintooda ku tibaaxeen maadaama dunidu hadda si wayn u isticmaalayso tiknoolajijadda casriga ah, isla markaana loo baahan yahay in wasaaradaha iyo hay'adaha qaranku la jaan qaadaan isticmaalka tiknoolajiyadda casriga ah, in ay muhiim tahay in la aasaaso waaxdan ICTga.

## 5.4 KOR U QAADIDDA KAALINTA HAWEENKA EE HAY'ADDA SHAQAALAHA DAWLADDA,  GAAR AHAAN MAAMULKA

Hay'adda Shaqaalaha  Dawladdu waxa ay mar kasta ku dadaalaysaa in ay kor u qaaddo kaalinta haweenka ee dalka gaar ahaanna shaqaalaha guud ee qaranka iyo kan Hay'adda Shaqaalaha

Dawladda iyada oo ka jawaabaysa qorshaha horumarinta qaranka (NDP2) oo dhiirigelinaya ka qayb qaadashada haweenka ee arrimaha maamulka iyo in kor loo qaado tirada shaqaalaha haweenka ah ee ka shaqeeya xafiisyada dawladda.

Haddaba, iyada oo haweenka reer Somaliland ay kaalin mug leh kaga jiraan kor u qaadista dhaqaalaha iyo cududda shaqo ee dalka, waxa lagama maarmaan ah in kaalintaas muhiimka ah la aqoonsado isla markaana la siiyo mudnaanta koowaad marka ay timaaddo shaqada dawladda, gaar ahaan maamulka iyo maaraynta shaqaalaha dawladda.

Iyada oo arinkaa laga duulayo, Hay'adda Shaqaalaha Dawladdu waxa ay sannadkan kor u qaadday heerka haweenka ee dhanka maamulka, waxaana xusid mudan in Guud ahaan Hay'adda Shaqaalaha Dawladdu ay ka kooban tahay 7 Agaasime waaxeed, 3 kamid ahina ay yihiin haween, kuwaas oo jagooyinkaas ku helay aqoon, karti iyo hufnaan shaqo oo ay muujiyeen. Waaxaha ay hoggaamiyaan xubnaha haweenka ahi ee Hay'adda Shaqaalaha waxa ka mid ah:

1. Waaxda Maamulka iyo Maaliyadda
2. Waaxda Tayaynta iyo Tababarka Cudduda Shaqaalaha
3. Waaxda Shaqo qorista, Xulista iyo Dallacsiinta

Sidoo kele waxa jira haween madax ka ah qaar ka mid ah xafiisyada muhiimka ah ee Hay'adda Shaqaalaha Dawladda oo aan ka xusi karno maamulaha xafiiska kaydka xogta shaqaalaha dawladda iyo Xafiisyo Kale.



***Agaasimayaasha Waaxda Tababarka Cududda shaqaalaha, Agaasimaha Waaxda Maamulka iyo Maaliyadda, Agaasimaha Waaxda Shaqo Qorista Xulista iyo Dacalaacada Iyo Madaxa Xafiiska Kaydka Xogta Shaqaalaha***

# 6. QALABAYNTA IYO DHISMAYAASHA CUSUB EE XAFIISYADA

Waxa dib u habayn ballaadhan lagu sameeyay hababka shaqada iyo qeexidda masuuliyadaha shaqaalaha hay'adda ee ka hawlgala xarunta guud. Sidoo kele waxa dib u eegis iyo dib u habayn lagu sameeyay qaab-dhismeedka Hay'adda guud ahaan, iyada oo qalabayn ballaadhan lagu sameeyay dhamaan xafiisyada xarunta ee Hay'adda si shaqada iyo adeegga la bixiyaa u noqdo mid u cuntama una hirgala sidii loo rabay in uu u socdo.

Waxa sidoo kele la soo kordhiyey dhismayaal cusub oo loogu talo galay in ay fududeeyaan shaqooyinka ka socda xarunta guud ee Hay'adda Shaqaalaha Dawladda. Dhismayaasha soo kordhay oo dhaqaalaha ku baxay ay bixisay dawladda Somaliland waxa ka mid ah dhismayaal aad muhiim ugu ah guud shaqada sida hoos ku cad.

## 6.1 DHISMAHA CUSUB EE HOOLKA HAY'ADDA SHAQAALAHA DAWLADDA

Hoolka cusub ee Hay'adda Shaqaalaha Dawladda oo ka kooban dhisme aad u wayn waxa loogu talagalay in lagu qabto xafladaha waawayn ee guud ahaan wasaaradaha iyo hay'adaha dawladdu qabanayaan si looga maarmo isla markaana loo tashiilo kharashaadka dawladda ee ku bixi lahaa hudheellada gaarka loo leeyahay.

Hoolkan oo manfac badan u yeelan doona guud ahaan hay'adaha dawladda waxa ku baxay dhismihiisa kharash gaadhaya **$168,000** oo ay bixisay dawladda Somaliland. Bixinta qandaraaska dhisidda hoolkana waxa la mariyey nidaam sharci ah oo ku dhisan tartan furan oo uu maamulayey xafiiska qandaraasyada qaranku.

Dhismahani waxa uu noqon doonaa dhisme casri ah oo u diyaarsan kafaynta iyo hirgalinta munaasibadaha iyo xafladaha qaran ee dalkeena ka dhaca, waxana loo samayn doonaa nidaam iyo qorshe lagu maamulo, iyada oo si joogto ah loo ilaalin doono tayadiisa iyo fayo dhawrkiisaba.

## 6.2 DHISMAHA XAFIISYADA HAWL-GABKA QARANKA

Hay'adda Shaqaalaha Dawladda oo kaashanaysa masruuca dib u habaynta shaqaalaha dawladda ee CSSP, waxa ay dhamaystirtay qorshaha iyo naqshadda dhisme dabaq ah oo gaar u noqon doona waaxda hawl-gabka iyo xaqsiinta shaqaalaha qaranka.

Dhismahan oo laga dhisi doono xarunta guud ee Hay'adda Shaqaalaha Dawladda, waxa la marin doonaa nidaamka qandaraasyada qaranka, waxaana la rajaynayaa in dhismahaa sida ugu dhakhsaha badan loo bilaabo ka dib marka nidaamka bixinta qandaraaskiisu ka soo dhamaado xafiiska qandaraasyada qaranka.

## 6.3 QALABAYNTA XAFIISYADA KALA DUWAN EE HAY'ADDA SHAQAALAHA DAWLADDA .

Waxa gebi ahaanba dib loo habeeyay qaabka xafiisyada xidhiidhka dad-waynaha, xafiiska kaydka xogta shaqaalaha (national civil service archeive) iyo xafiiska ilaalinta mushaharka shaqaalaha dawladda (payroll control office) iyada oo qalabayn ballaadhan lagu sameeyay laguna qalabeeyay agab xafiis oo dhamaystiran, kombuyuutaro, daabacaado (printers) iyo dhamaan wixii qalab hawl lagu socodsiin lahaa oo dhan.




***Xigasho: 2020, HSHD Guddoosiintii qalabka ee wasaaradda Gaashaandhiga***

## 6.3 QALABAYNTA KU WAREEJINTII WASAARADAHA QORSHAYNTA QARANKA, CADAALADDA IYO GAASHAAN DHIGA.

Hay'adda Shaqaalaha Dawladda oo ka duulaysa siyaasadda xoojinta waaxaha cududda shqaalaha dawladda isla markaana kaashanaysa mushruuca dib u habaynta shaqaalaha dawladda ee CSSP ee Baanka Adduunku ka caawiyo, waxa lagu wareejiyey wasaaradaha caddaaladda, gaashaandhigga iyo Qorshaynta Qaranka qalab xafiiseed isugu jiray Kombuyuutarro, agab xafiiseed iyo qalabka loo isticmaalo kaydinta xogaha, iyada oo wasaaradaha Deegaanka, Tamarta & Macdanta iyo Wasaaradda Qoyska & Arrimaha Bulshada iyagana lagu wareejiyey qalab noocan oo kale ah.

Wasaaradaha qalabkan lagu wareejiyey waxa lagu xushay in ay hirgaliyeen siyaasadihii, hab-raacyadii iyo weliba qaab dhismeedyadii shaqo ee ay Hay'adda Shaqaalaha Dawladdu u samaysay wasaaradahan. Sidaas darteed ayaa wasaaradahan loo gartay sannadkan in ay ahaayeen kuwii ugu wanaagsanaa ee hirgaliyey nidaamyadaas. Faahfaahinta qalabka lagu wareejiyey wasaaradahaasina waa sidan:

| No. | Qalabka | Tirada |
|---|---|---|
| 1. | Computers | 15 |
| 2. | Printers (laser jet printers) | 6 |
| 3. | Vedio conference set | 1 |
| 4. | Harddisks | 8 |
| 5. | Office chairs | 15 |
| 6. | Cupboards | 15 |
| 7. | Excutive Chairs | 2 |
| 8. | Meeting tables-with 12 chairs | 1-set |

***Xigasho: 2020, Waaxda Qorshaynta Qaynta Statistikada***



***Xigasho: 2020, HSHD Gudoonsiintii qalabka ee wasaaradda Cadaaladda***



***Xigasho: 2020, HSHD Guddoonsiintii qalabka ee wasaaradda Caddaaladda***

# 7. XOGAHA SHAQAALAHA DAWLADDA – KORODHKA, DALLACAADAHA IYO WAREEJINTA SHAQAALAHA

Hay'adda Shaqaalaha Dawladda oo ay masuuliyadeeda koowaad tahay xulista, shaqaalaysiinta, Dallacsiinta, Darajo dhimista, Anshax marinta shaqaalaha Dawladda, wareejinta shaqaalaha iyo ilaalinta iyo jaangoynta qaab-dhismeedka Wasaaradaha iyo Hay'adaha Dawladda iyo hubinta masuuliyiinta loo magacaabayo xilalka Agaasime waaxeedyada oo Wasaaradaha iyo Hay'ado badaniba ay soo dalbadeen ansixin, kana gudanay waajibkaadkii masuuliyadeed ee sharcigu jideeyay, run ahaana aanu ku ammaanayno wada shaqaynta iyo fahamka ay nala qaataan ee ahmiyadda ay leedahay hawshan baaxadda leh ee Hay'adda Shaqaaluhu gacanta ku hayso.

Haddaba, Sannadka 2020ka xogaha shaqaalaha dawladda ee la xidhiidha korodhka shaqaalaha, dallacsiinta iyo hoos u dhigidda shaqaalaha, wareejinta, anshax marinta iyo ruqsaynta waxa aanu ku soo gudbinaynaa xaggan hoose:

## 7.1 SHAQAALAHA LA SHAQAALEYEY

Sannadkan Hay'adda Shaqaalaha  Dawladda  oo ka jawaabaysa baahida shaqaale ee wasaaradaha iyo hay'adaha dawladda, isla markaana gudanaysa waajibaadkeeda dastuuriga ah ee shaqaalaynta iyo buuxinta boosaska shaqo ee ka bannaanaada wasaaradaha iyo hay'adaha dawladdu, waxa ay sannadkan 2020ka shaqaalaysiisay shaqaale tiradoodu dhan tahay **1054** shaqaale oo isugu jira darajooyinka kala duwan ee A, B, C iyo D iyada oo darajooyinka 'A' iyo 'B' loo qaatay dhalinyaro aqoonyahanno ah oo ka soo qalin jebiyay jaamacadaha dalka iyo kuwo debedda ahba. Shaxdan hoose ayaana faah-faahinaysa tirooyinka ay kala yihiin iyo wasaaradaha ay ka kala hawl galaan shaqaalahaa cusubi:

| **Darajooyinka shaqaalaha cusub ee sannadka 2020ka** | | | | |
|---|---|---|---|---|
| **Darajadda A** | **Darajadda B** | **Darajadda C** | **Darajadda D** | **Wadarta Guud** |
| 446 | 537 | 245 | 219 | **1447** |

***Xigasho: 2020, Waaxda Qorshaynta Xafiiska Statistikada/xafiiska Guddoomiyaha***

## 7.2 SHAQAALAHA LA DALLACSIIYAY

Shaqaalaha la dallacsiiyay ee sannadkan ka dallacay darajooyinkii ay hore ugu mushahar qaadan jireen iyada oo sannadkan loo eegay warbixinta heerka shaqo wanaagga ay muujiyeen (work performance report) iyo warbixinta tilmaamaysa sida ay uga soo xaadireen goobta shaqada (Employee attendance report), isla markaana la waafajiyey sharciga shaqaalaha dawladda ee xeer Lr,7/96, waxa darajooyinkii hore ay ugu mushahar qaadanayeen ka dallacay shaqaale tiradoodu gaadhayso **424** qof. Shaxdan hoose ayaana tilmaamaysa faah-faahinta darajooyinkii ay ka soo dallaceen iyo ta ay u dallaceen:

| Shaqaalaha ka dalacay heerarkii darajo ee ay hore ugu shaqayn jireen | | | |
|---|---|---|---|
| **Darajadda B-A** | **Darajadda C-B** | **Darajadda D-C** | **Wadarta Guud** |
| 246 | 93 | 83 | **422** |

***Xigasho: 2020, Waaxda Qorshaynta Xafiiska Statistikada/xafiiska Gudoomiyaha***

## 7.3 SHAQAALAHA HOOS LOO DHIGAY

Shaqaalaha hay'adaha iyo wasaaradaha dawladda ee darajooyinkooda hoos loo dhigay (demotion) sababo la xidhiidha hab-dhaqankooda shaqo ama xaqiijinta shahaadooyinka iyo heerarkooda waxbarasho, isla markaana masuuliyiinta Hay'adda Shaqaalaha Dawladdu ku qanceen in aanay sii ahaan karin darajooyinka ay ku shaqeeyaan waxa ay tiradoodu dhamayd **133** qof oo ka kala shaqeeya gobollada iyo degmooyinka dalka. Faahfaahintuna waxa ay ka muuqataa shaxdan hoose:

| Shaxda shaqaalaha hoos loo dhigay darajooyinka ay ku shaqeeyaan ee sannadka 2020ka | | | |
|---|---|---|---|
| **Darajadda A-B** | **Darajadda B-C** | **Darajadda C-D** | **Wadarta Guud** |
| **82** | **51** | **14** | **147** |

***Xigasho: 2020, Waaxda Qorshaynta Xafiiska Statistikada/xafiiska Gudoomiyaha***

## 7.4 SHAQAALAHA LA WAREEJIYEY

Sida sharciga shaqaalaha dawladdu oggolyahay waxa sannadka 2020ka ka wareegay wasaaradihii ama hay'adihii dawladda ee ay u shaqaynayeen shaqaale tiradoodu dhantahay **84** qof, kuwaas oo u wareegay wasaarado ama hay'ado kale oo dawli ah.

Tirada Shaqaalaha soo codsaday in ay ka beddeshaan wasaaradihii iyo hay'adihii ay u shaqaynayeen waxa ay sannadka 2020ka ahaayeen tiro intaa ka badan, balse markii loo eegay aqoontooda iyo shahaadooyinka ay sitaan, isla markaana la hubiyey in ay ka shaqayn karaan wasaaradaha iyo hay'adaha loo beddelayo, waxa ansaxay tirada shaqaalaha ah ee aynu kor ku soo sheegnay, kuwaas oo u qaybsanaa derejooyinka kala duwan ee A, B, C iyo D.

## 7.5 SHAQAALAHA LA ANSHAX MARIYAY

Shaqaalaha sannadka 2020ka la anshax mariyay ee helay digniinaha 1aad, 2aad ama 3aad iyo kuwa ay natiijadooda anshax marintu noqotay shaqo ka saaris ka dib markii la qiimeeyay heerarka gefafka sharci ee ay geysteen, iyada oo loo raacayo xeerka shaqaalaha dawladda ee Xeer Lr.7/96, waxa ay tiradooda guud dhamayd **586** qof oo lagu anshax mariyey heerarka kala duwan ee anshax marinta. Shaxdan hoose ayay ka muuqataa faahfaahinta inta shaqadda laga saaray iyo kuwa helay digniinaha faylashooda shakhsiga ah loo geliyey:

| | Digniinaha 1aad, 2aad 3aad | Laga saaray Shaqada | Wadarta good |
|---|---|---|---|
| | **71-shaqaale** | **515-shaqaale** | **586-shaqaale** |

***Xigasho: 2020, Waaxda Qorshaynta Xafiiska Statistikada/xafiiska Gudoomiyaha***

## 7.6 SHAQAALAHA LOO OGGOLAADAY FASAXYADA WAXBARASHO

Sida aan garan karno, shaqaalaha dawladda waxa ku badan dhalinyaro da'yar ah oo ka soo qalin jebiyay jaamacadaha dalka, iyada oo mararka qaar ay Hay'adda Shaqaalaha Dawladda ka soo dalbadaan fasax waxbarasho oo dalka debeddiisa ay ku soo qaadanayaan takhasusaad sare.

Haddaba si aanu u dhiirri gelino koboca aqoonta iyo tayada shaqaalaha dawladda, waxa aanu u oggolaanay sannadkan tiro shaqaale ah oo soo dalbaday fasax waxbarasho oo dalka debeddiisa ah, tiradaas oo dhamayd **9** arday waxa ay heleen fasax sharci ah oo la waafajiyey sharciga shaqaalaha dawladda, isla markaana ay ugu baxeen waxbarasho dibadeed. Faahfaahinta wasaaradihii iyo Hay'adihii ay ka kala socdeen waxa ay ka muuqataa shaxdan hoose:

| S/N | Wasaaradda/Hay'adda | Tirada Shaqaalaha |
|---|---|---|
| 1. | Wasaaradda Waxbarashada iyo Sayniska | 3 |
| 2. | Wasaaradda Xidhiidhka Golayaasha iyo Arrimaha Dastuurka | 1 |
| 3. | Wasaadda Horumarinta Biyaha | 1 |
| 4. | Maxkamadda Sare | 1 |
| 5. | Komishanka Maamul Wanaagga | 1 |
| 6. | Xafiiska Hanti Dhawraha Guud ee Qaranka | 1 |
| **Wadarta Guud** | | **9-Qof** |

***Xigasho: 2020, Waaxda Qorshaynta Xafiiska Statistikada/xafiiska Gudoomiyaha***

## 8. QAADASHADII  WEJIGA LABAAD EE SHAQAALAHA BARNAAMIJKA HIBADA IYO HAL-ABUURKA (TMP)

Badhtamihii sannadka 2020ka waxa la shaaciyey qaadashadda dufcada 2aad ee shaqaalaha hibada iyo hal-abuurka (TMPs), iyada oo lagu faafiyey boosaska shaqo ee loo tartamay warbaahinta gudaha iyo shabakadaha lagu xayaysiiyo shaqooyinka ee caalamiga ahba.

Baahinta ka dib waxa soo xaraystay araaji iyo codsiyo shaqo oo dhamaystiran tartamayaal tiradoodu dhan tahay **1577** tartame, waxaana si degdeg ah loo bilaabay in la kala guro codsiyadii shaqo (CV) ee ay soo gudbiyeen tartamayaashu iyada oo uu barnaamijka dib u habaynta shaqaalaha dawladda ee CSSP ku kaabay hawshan la taliye caalamiy ah (International Consultant) oo hore uga soo shaqeeyay dalal kale oo barnaamijkan hirgeliyey.

Waxa ku soo baxay liiska gaaban (short list) tartamayaal tiradoodu dhantahay **78** tartame kuwaas oo u fadhiistay imtixaan qoraal ah (written test) oo ay boos kasta u tartamayeen tiro cayiman oo tartamayaasha ka mid ah. Imtixaanka ka dibna waxa la galay imtixaankii waraysiga ahaa (Interview) sida ay dhigayso siyaasadda shaqaalaynta ee xafiiska Hay'adda Shaqaalaha  dawladdu, (Recruitment policy).

Ugu dambayntii waxa imtixaanka ku soo baxay tartamayaal tiradoodu dhantahay **20** guulayste kuwaas oo ku guulaystay in ay ku kor maraan dhamaan nidaamkii iyo hannaankii imtixaan ee la mariyay. Wasaaradaha iyo hay'adaha dawladda ee ay ka kala hawlgalaan shaqaalaha barnaamijkanina waa sidan hoos ku xusan:

| No. | MDAs | Number of Positions | Position tittles |
|---|---|---|---|
| **1.** | **Civil Service Commission** | **1** | ✓ **Head of Organizational Establishment Development** |
| **2.** | **Civil Service Institute** | **1** | ✓ **Network and System Administration** |
| **3.** | **Ministry of Employment and Social affairs** | **3** | ✓ **Head of policy planning and development**<br>✓ **Head of Research and Statistics**<br>✓ **Director of Legal Affairs** |
| **4.** | **Ministry of Energy and Mining** | **5** | ✓ **Director of Legal Affairs**<br>✓ **Energy specialist**<br>✓ **Mining Specialist**<br>✓ **Human Resource Officer**<br>✓ **Communication Specialist** |
| **5.** | **Ministry of Justice** | **4** | ✓ **Head of Archive and Record Management** |

| No. | MDAs | Number of Positions | Position tittles |
|---|---|---|---|
| | | | ✓ Head of ICT<br>✓ Head of Human Resources and Development<br>✓ Head of Monitoring and Evaluation |
| 6. | Ministry of Defense | 4 | ✓ Director of Internal Audit<br>✓ Director of Legal Affairs<br>✓ Head of Procurement and Logistics<br>✓ Communication Specialist |
| 7. | Ministry of National Planning | 2 | ✓ Public Relation and Communication Officer<br>✓ Demographic Specialist |
| | | 20- positions | |

***Xigasho: 2020, Waaxda Qorshaynta Xafiiska Statistikada/xafiiska Guddoomiyaha***

Waxa xusid mudan in lix kaalmo shaqo oo loo tartamay la gaadhi waayay ama tartamayaashu ay gaadhi waayeen dhibcihii loogu talo galay in kaalintaa shaqo lagu helo (Pass Mark).

**8.1 QAADASHADA SHAQAALAHA IYO XUBNAHA XIDHIIDHIYAASHA XOGTA COVID-19 EE SADDEXDA GOBOL EE M/JEEX, AWDAL IYO TOGDHEER**

Hay'adda Shaqaalaha Dawladda oo ka jawaabaysa baahida loo qabo isku dubaridka xogaha Sadhada dunida saamaysay ee COVID-19 waxa ay shaqaalaysay saddex qof oo la shaqeeya wasaaradda Horumarinta Caafimaadka isla markaana xogaha caafimaad ee la xidhiidha caabuqa COVID-19 si joogto ah isugu dubarida gaar ahaan gobollada Awdal, Togdheer iyo Maroodijeex.

Shaqaalahan oo ay bixinta mushaharooyinkooda gacan mug leh ka gaysatay hay'adda laga leeyahay dalka Sweden ee 'SIDA' ayaa la mariyey nidaamka shaqaalaysiinta ee Hay'adda Shaqaalaha Dawladda .



## 9. TAYAYNTA MAAMULKA SHAQAALAHA CISBITAALKA GUUD EE HARGEYSA

Hindisaha barnaamijka tayaynta cisbitaalka guud ee Hargeysa waxa iska lahaa madax-waynaha Jamhuuriyadda Somaliland Mudane Muuse Biixi Cabdi, waxanu kulan wada tashi isugu yeedhay badhtamihii sannadka 2020ka masuuliyiinta wasaaradda horumrinta caafimaadka,gudoomiyaha Hay'adda Shaqaalaha Dawladda , Agaasimaha Guud ee wasaarada Caafimaadka iyo Agaasimaha Cusbitaalka Hargeysa si dibu-habayn iyo dardargalin loogu sameeyo nidaamka guud ee hab-maamulka cisbitaalka iyo adeeg bixinta caafimaad cisbitaalka, waxana shirkaas lagu go'aansaday in la qaado talaabooyin dhawr ah oo lagu dardargalin ayo shaqada cisbitaalka iyo warbixin qiimayn ah laga diyaariyo shaqaalaha iyo habka adeeg bixinta cisbitaalka;

### 9.1 DIYAARINTII WARBIXINTA SHAQAALAHA CISBITAALKA GUUD

Badhtamihii sannadka 2020ka, waxa ay Hay'adda Shaqaalaha Dawladda oo kaashanaysa wasaaradda horumarinta caafimaadka iyo xubno ka mida saraakiisha cisbitaalka guud ee Hargeisa, diyaariyeen warbixin la xidhiidha qaab-dhismeedka cisbitaalka Hargeysa iyo tayadda adeega maamul ee cisbitaalka.

Warbixintan waxa ka soo baxday soo jeedin ah in maamulayaasha laamaha kala duwan ee cisbitaalka guud oo mudo dheer ka shaqaynayay cisbitaalka wax laga badalo, isla markaana dib loo eego qaab-dhismeedka maamul ee cisbitaalka guud sidoo-kalena siyaasadaha iyo qorshaha istiraatiijiyadeed ee cisbitaalka wax laga badalo si loo wanaajiyo tayada adeegyadda uu cisbitaalku bixiyo.

Hay'adda Shaqaalaha Dawladdu iyada oo ka duulaysa waajibaadkeeda iyo masuuliyadda dastuuriga ah ee ay qaranka ugu aadan tahay waxa ay warbixinta qiimaynta adeega maamul ee cisbitaalka Hargeisa diiradda ku saartay sadex qodob oo kala ahaa.

1. Shaqaalaha cisbitaalka guud ee Hargeysa
2. Nidaamka maamul ee maaraynta maamulka shaqadda iyo shaqaalaha
3. Qiimaynta adeega uu bixiyo cisbitaalka guud ee Hargeisa

Iyada oo Hay'adda shaqaaluhu daba socota natiijadii warbixinta ka soo baxday, waxa markiiba loo diyaariyey koox ka mida saraakiisha Hay'adda Shaqaalaha Dawladda oo tirikoob iyo qiimayn ku samaysa shaqaalaha cisbitaalka Hargeysa ee payrollka ku jira iyada oo dhamaantood lagu hubiyay shahaadooyinkooda iyo imaatinkooda goobta shaqadaba waxana markiiba soo baxday in tiro shaqaalahaa cisbtibaalka ka mid ah aanay goobta shaqada ka soo xaadirin mudooyinkii u dambeeyay mushaharooyin kooduna si qaldan u baxayeen, waxanay markiiba si dagdag ah u joojisay mushaharooyinkii shaqaalahaas, waxana la galay sidii qaladaadka ay warbixintu sheegtay loo sixi lahaa.

## 9.2 DIYAARINTA QAAB DHISMEEDKA CUSUB EE CISBITAALKA GUUD EE HARGEISA

Sidoo kele iyada oo laga duulayo natiijooyinkii warbixintu soo saartay waxa lagama maar maan noqotay in la jaan gooyo qaab-dhismeedka iyo qalfoofka shaqo ee cusbitaalka guud si loo saxo nidaamka maamulka shaqada iyo shaqaalaha, kala saraynta iyo kala amar qaadashadda shaqaalaha, tayada adeega cusbitaalka iyo isla xisaabtanka waxana si dhakhso ah loo diyaariyey qodobadan;

- ✓ Qaab-dhismeed dhamaystiran oo uu cusbitaalka guud ee hargeisi leeyahay
- ✓ Xog koobaysa cisbitaalku waxa uu u taaganyahay (hospital profile)
- ✓ Miisaaniyadda cisbitaalka guud (budget plan)
- ✓ Qorshe hawl-qabad oo lix bilood ah (6 months consolidated work plan)
- ✓ Qorshaynta jadwalka kulumada joogtadda ah ee masuuliyiinta cisbitaalka (schedule of meetings)
- ✓ Kaltanka shaqada ee shaqaalaha oo si habaysan loo dajiyo (shifts and planed staff schedules)
- ✓ Iyo diyaarinta warbixin joogto ah oo xili ku mudaysan (semiannual and annual reports**).**

Hadaba iyada oo arintaa laga duuliyo waxa ay Hay'adda Shaqaalaha Dawladdu diyaarisay qaab-dhismeedka cusub ee uu hada cisbitaalka guud ee hargeisi ku shaqeeyo iyada oo la xayeysiiyey dhamaan saraakiisha ka shaqaynaysa boosaska sarsare ee maamulka cisbitaalka guud sida qodobka hoose ee warbinta ku xusan.

**9.3 NAADINTII IYO QAADASHADII SARAAKIISHA CUSUB EE CISBITAALKA HARGEISA**

Sida aan kor ku soo sheegnay warbixinta qiimaynta adeega maamul ee cisbitaalka guud ee Hargeisa waxa ka soo baxday soo jeedin ah in maamulayaasha laamaha kala duwan ee cisbitaalka guud oo mudo dheer ka shaqaynayay cisbitaalka wax laga badalo isla markaana dib loo eego lagu sameeyo kala saraynta iyo awoodaha shaqo ee saraakiisha cisbitaalka.



***Xigasho,2020 HSHD, Gudiga Imtixaanka iyo Xulista Xubnaha Maamulka Cibsitaalka Guud ee Hargeisa***

Hay’adda Shaqaalaha  Dawladda  iyo masuuliyiinta wasaaradda horumarinta caafimaadka oo uu ka mid yahay agaasimaha guud ee cisbitaalka hargeisi waxa ay go’aan ku gaadheen in dhamaan si dah furan oo xalaal ah loo naadiyo dadkii ka hawlgali lahaa boosaska maamul ee cisbitaalka guud ee Hargeisa, waxana si dhakhso ah markiiba loo naadiyay shaacinta in ay boosaska u Sarreeya ee maamulka cisbitaalka Hargeisa banaanyihiin isla markaana loo tartami doono shaqooyinkaas sida sida sharciga shaqaalaha dawladdu tilmaamayo.



***Xigasho,2020 HSHD, Gudiga Imtixaanka iyo Xulista Xubnaha Maamulk Cibsitaalka Guud ee Hargeisa***

Gudoomiyaha Hay’adda Shaqaalaha  Dawladda  ayaa markiiba ku dhawaaqay gudi farsamo oo ka shaqaysa tartanka boosaska shaqo ee ka banaanaaday cisbitaalka guud ee Hargeisa, xubnaha gudidan oo ka koobnaa daneeyayaasha iyo cida ay taabanayso hawlaha shaqo ee cisbitaalka hargeisi waxa ay u dhignaayeen sidan;

- ✓ Wasaaradda horumarinta caafimaadka- Xubin
- ✓ Hay’adda Shaqaalaha  Dawladda - Xubin
- ✓ Hay’adda Mihnadlayaasha Caafimaadka - Xubin
- ✓ Komishanka Maamul Iyo La Dagaalanka Musuqmaasuqa- Xubin
- ✓ Hay’adda Dhawrista Tayadda- Xubin
- ✓ Agaasimaha Cisbitaalka Guud ee Hargeisa – Xubin
- ✓ Wasaaradda Maaliyadda (Xafiiska Xisaabiyaha Guud) – Xubin



***Xigasho,2020 HSHD, Dhaarinta Gudiga Imtixaanka iyo Xulista Xubnaha Maamulka Cibsitaalka Guud ee Hargeysa***

Dhamaan xubnaha ay ka koobantahay gudida farsamo ee kor ku sheegan waxa lagu dhaariyey in ay daacad ka noqdaan barnaamijka dib u habaynta cisbitaalka guud ee Hargeisa iyo in ay cadaalad u sameeyaan tartamayaasha soo codsaday in ay u tartamaan boosaska shaqo oo cisbitaalka guud.
Dhaarinta ka dib waxa ay xubnaha gudiga farsamo oo si dhaw ula shaqaynaya waaxda shaqaalaysiinta ee Hay'adda Shaqaalaha Dawladdu bilaabeen kala gurka iyo hubinta dhukumantiyadda codsadayaasha oo tiradoodu dhamayd **544-tartame** waxanay soo saareen in liistada gaaban (short list) ay ku soo baxeen tartamayaal tiradoodu dhantahay **65-Tartame**, tartamayaasha ku soo baxay liistadda gaaban waxa ay mudo yar ka dib u fadhiisteen imtixaan qoraala (Written test) sida siyaada shaqaalaysiinta ee Hay'adda Shaqaalaha Dawladdu dhigayso waxa tartamayaasha hadana laga qaaday imtixaan waraysi ah (Interview) si loo hubiyo xirfadooda shaqo iyo heerkooda waayo-aragnimo ee ay u leeyihiin hab-maamulka shaqooyinkacisbitaalka, waxana natiijadu noqotay in ay soo baxaan tartamayaasha aanu halkan hoose ku xusnay magacyadooda iyo boosdkooda shaqoba;

| No. | Name | Position | Overall Marks |
|---|---|---|---|
| 1. | Adnan Sayid Abdo | Deputy hospital director | 71% |
| 2. | Mohamed Ali Ibrahim | Admin and finance manager | 76% |
| 3. | Abdirisak Mohamed Mouse | Human Resource Manager | 63% |
| 4. | Dr. Idiris Ali Hassan | Clinical Coordinator | 89% |
| 5. | Mustafe Mohamed Abdilahi | Deputy Clinical Coordinator | 53% |
| 6. | Abdirisak Farah Hassan | Mental Health Administration | 60% |
| 7. | Ahmed-Yasin Abdi Osman | Matron | 63% |
| 8. | Abdinur Salebaan Arab | Hospital Cashier | 56% |

***Xigasho; 2020, Waaxda Qorshaynta Xafiiska Statistikada/xafiiska Gudoomiyaha***



***Xigasho; 2020, HSHD Guulaystaashii tartanka Boosaska shaqo ee cisbitaalka guud ee Hargeysa***

Ugu dambayntiina kooxda guulaystaasha ee kor ku xusan ayaa ka hor inta aan shaqadda lagu wareejin la siiyey tababarka indho furka (induction training) oo laba maalmood soconaayay, intaa kadibna waxa lagu wareejiyey xilkii iyo maamulkii shaqaddasi ay u hantaan maamulka cisbitaalka guud ee Hargeisa ilaa maantana iyagaa maamulaya, waxanay dhawaan Hay'adda Shaqaalaha Dawladdu ku samayn doontaa dib u qiimayn shaqadda iyo adeega cisbitaalka bal in isbadal jiro iyo inkale.

## 10.BAADHITAANADDA IYO KORMEERADDA LA SAMEEYAY

Horaantii sannadka 2018ka ayey ahayd markii Hay'adda Shaqaalaha Dawladda oo gacan ka helaysa mashruuca dib u habaynta shaqaalaha ee CSSP ay fulisay barnaamij balaadhan oo lagu tirkoobayo isla markaana lagu diiwaan-galin ayo dhamaan shaqaalaha dawladda ee ku sugan goboladda iyo dagmooyinka dalka, iyada oo la isticmaalayo habka casriga ah ee diiwaangaliya faraha indhaha (Biometric system) waxana loogu tagay goobkasta iyo dagmo kasta oo ay shaqaalahani ku sugnaayeen.

Sannadkii xigay ee 2019ka waxa ay Hay'adda Shaqaalaha Dawladdu awooda saartay habaynta qaab-dhismeedka shaqo iyo abuuridda shaqo qeexyadda shaqaalaha dawladda, waxana la dajiyey hababka la xisaabtanka shaqaalha dawladda iyada oo la sameeyay baadhitaano isdaba joog ah oo lagu beegsanayo wasaaraddo iyo hay'addo gaar ah.

Hadaba, sannadka 2020ka Hay'adda Shaqaalaha Dawladda oo kaashanaysa mashruuca dib u habaynta shaqaalaha dawladda waxa ay samaysay baadhitaanadii kormeeradii ugu waawaynaa ee la xidhiidhay shaqaalaa paryollka dawladda ku jira ama mushahar dawladeed qaata ee ku sugan dhamaan goboladda iyo dagmooyinka dalka, waxana kamida baadhitaanadda sannadkan la sameeyay "Barnaamijka baadhidda iyo dabagalka shaqaalaha liiska mushaharbixinta dawladda (Payroll Auditting), waxanaynu si faahfaahsan ugu sharxi doonaa natiijooyinkii ka soo baxay barnaamijkan qodobka kan xiga ee warbixinta;

### 10.1 BARNAAMIJKA HUBINTA IYO BAADHIDA XOGTA SHAQAALAHA DAWLADDA (PAYROLL, HR MINI AUDITING)

Badhtamihii bishii Sideedaad ee sannadka 2020ka waxa ay Hay'adda Shaqaalaha Dawladda oo kaashanaysa, komishanka maamul-wanaaga iyo la dagaalanka musuqmaasuqa, wasaaradda qorshaynta iyo horumarinta qaranaka iyo xafiiska hanti-dhawraha guud ee qaranka dalka ka bilowday barnaamij balaadhan oo lagu baadhayo boqolkiiba shan iyo labaatan (25%) shaqaalaha dawladda ee joogtadda ah kuwaas oo xogtoodu taalo ama ku jirto xog-kaydiyaa shaqaalaha dawladda.

Ujeedooyinka ugu muhiimsan ee ay hay'adda shaqaaluhu barnaamijkan ka lahaydna waxa ay ahaayeen in la hubiyo in shaqaale kasta oo ku soobaxay muunadan (sample) uu ku suganyahay goobtiisa shaqadda iyo in xogtiisu sax ku tahay sida Hay'adda Shaqaalaha Dawladdu u ahayso isaguna/iyaduna yahay/tahay qofka mushaharka dawladda ka qaata iyo in la hubiyo faylkiisha iyo xogtiisa shaqsiga ah (personal file).



***Xigasho; 2020, Waaxda Qorshaynta ee HSHD, Kooxda baadhida oo hubin aya qof shaqaale ah***

Hadaba, si barnaamijkani u hirgalo waxa uu gudoomiyahay Hay'adda Shaqaalaha Dawladdu wareegto heegan lagu galin ayo shaqaalaha dawladda isla markaana lagu joojin ayo inta barnaamijkani socdo fasaxyadda shaqaalaha.

Tiradda ah boqolkiiba shan iyo labaatan ee shaqaalaha dawladda waxa loo maray hab aqoonaysan (scientific method) waxanay tiradda muunadda ahi (Sample) dhamayd boqolkiiba 25% tiro ahaanna noqonaysa 3449-shaqaale oo ku kala sugan dhamaan goboladda iyo dagmooyinka dalka, shaxdan hoose ayaa tilmaamaysa inta gobolkasta kaga dhacday ee la baadhay;

| S/N. | Gobolka | Muunadda/Sample |
|---|---|---|
| **1.** | **Gobolka Maroodi-jeex** | **1956** |
| **2.** | **Gobolka Awdal** | **315** |
| **3.** | **Gobolka Saaxil** | **280** |
| **4.** | **Gobolka Togdheer** | **316** |
| **5.** | **Gobolka Sool** | **291** |
| **6.** | **Gobolka Sanaag** | **291** |
| **Wadarta** | | **3449** |

***Xigasho; 2020, Waaxda Qorshaynta Xafiiska Statistikada***


Waxana lifaaqa dambe ee warbixinta laga heli doonaa tirada shaqaalaha wasaarad iyo hay'adkasta kaga dhacday muunada iyo halka iyo goboladda ay ku kala sugan yihiin.

Shaqaale kasta ama qofkasta oo ku jira liiska muunadda ah oo loogu tagay goobta shaqadda waxa laga soo buuxiyey questionnaire ay ku jiraan su'aalo kala duwan loogu talo galay in lagu ogaado xogo guud iyo kuwo gaar ahba.



***Xigasho; 2020, Waaxda Qorshaynta ee HSHD, Kooxda baadhida oo hubin aya qof shaqaale ah***

Hadaba, kooxda barnaamijkan waday oo uu hogaamin ayo agaasimaha guud ee Hay'adda Shaqaalaha Dawladda waxa ay ugu tageen goobtii shaqadda boqolkiiba 88% shaqaalaha la raadin ayay kuwaas oo si dhamaystiran uga jawaabay su'aalihii iyo xogtii laga doonayay, halka boqolkiiba 12% shaqaalahaas kamidii ay ka maqnaayeen goobta shaqadda sida ka muuqata jaantuska hoose;




***Xigasho; Waaxda qorshaynta Xafiiska Statistikada***

Markii masuuliyiinta waxaha cududda shaqaalaha ama masuuliyiintii goobaha shaqo ee ay kooxda baadhistu tagtay la waydiiyey sababaha ay goobta shaqadda uga maqanyihiin shaqaalahaas boqolkiiba 12% ah ee aynu kor ku soo sheegnay waxa ay bixiyeen jawaabaha shaxdan hoose ku cad iyada oo jawaab kasta oo ay bixiyaana la waydiin ayay waxa ay cadaymo u hayaan;


| What is the reason for employee absence | frequency | Percentage |
|---|---|---|
| Absent without reason | 53 | 14.13% |
| Education leave | 9 | 2.40% |
| Maternity leave | 26 | 6.93% |
| Other leave | 130 | 34.67% |
| Passed Away | 24 | 6.40% |
| Sick leave | 75 | 20.00% |
| Yearly leave | 58 | 15.47% |
| **Grand Total** | **375** | **100.00%** |

***Xigasho; 2020, Waaxda Qorshaynta Xafiiska Statistikada***

Sida shaxda sare ka muuqata shaqaalaha ugu badani ee kamida kuwa aan loogu tagin goobtoodii shaqadu waxa ay ku maqnaayeen fasaxyadda caadiga ah ee ***fasax sannadeed, fasax caafimaad, fasax dhalmo, fasax waxbarasho iyo fasaxyo kale***, kuwaas oo lagu qancay kadib markii cadaymaha fasaxyadan ay kooxda baadhistu ugu tageen faylasha shaqsiga ah (personal files) ee

shaqaalahan, waxase xusid mudan in shaqaale tiradoodu dhantahay 53-qof oo u dhigma boqolkiiba 14% tiradda maqan ay uga maqnaayeen goobta shaqadda sabab la'aan lana sugayo in dhawaan go'aan sharci laga qaato. Halka sidoo kele shaqaale tiradoodu dhantahay 24-qof oo u dhiganta boqolkiiba 6% ee tiradda maqan ay geeriyoodeen balse aan xogtooda dhimo alle haw-naxariistee la soo gaadhsiinin Hay'adda Shaqaalaha Dawladda .

Sidoo kele waxyaabaha la baadhayey waxa ka mid ahaa in shaqaalaha ku jira liiska muunadda ah in ay leeyihiin shaqo-qeexyo (job description) iyo inkale waxa ay boqolkiiba 76% kamidii ku jawaabeen waxanu leenahay shaqo qeexyo (job description), halka boqolkii 24% ka mida shaqaalahaasi ay ku jawaabeen ma lihin shaqo qeexan sida ka muuqata jaantuskan;




***Xigasho; 2020, Waaxda Qorshaynta Xafiiska Statistikada***

## 10.2 BAADHITAANADA IYO KORMEERADA KALE EE LAGU SAMEEYAY WASAARADAHA IYO HAY'ADAHA DAWLADDA.

Waajibaadka iyo masuuliyadda dastuuriga ee Hay'adda Shaqaalaha Dawladda waxa ka mid ah baadhida, dabagalka iyo qiimaynta tayada adeegyadda ay shaqaalaha dawladdu u gudbiyaan bulshada. Hadaba, hay'adda shaqalaha dawladda oo fyulin aysa waahjibaadkan shaqo waxa ay baadhid iyo kormeero ku samaysay wasaaro iyo hay'addo kala duwan kuwaas oo ay ka mid ahaayeen;

- Wasaaradda Warfaafinta Dhaqanka & Wacyigalinta
- Wasaaradda Waxbarashadda iyo Sayniska
- Wasaaradda Horumarinta Caafimaadka

Sidoo kele wasaaraha kormeerada iyo baadhida laga fuliyey waxa ka mid ahaa wasaaradihii ay Hay'adda Shaqaalaha Dawladdu sannadkii hore u samaysay qaab-dhismeedka shaqo (Organizational Structures), kuwaas oo la hubin ayay sida ay u hirgaliyeen qaab-dhismeedkii iyo qalfoofkii shaqo ee loo sameeyay.

# 11.SIYAASADAHA IYO HABRAACYADDA LA SAMEEYAY SANNADKA 2020KA

Hay'adda Shaqaalaha Dawladda sannadadii u dambeeyay waxa ay dadaal wakhti iyo maalba leh galisay diyaarinta shuruucda, siyaasadaha iyo hab-raacyadda maamul ee lagu maamulayo shaqaalaha dawladda. Sida warbixinta sannadkii hore ku jirtay waxa la diyaariyey 16 hab-raac sharci ee hada sida wayn looga isticmaalo xafiisyadda maamulka shaqaalaha dawladda, kuwaas oo tababaro isdaba jooga lagu siiyey Agaasimayaasha waaxa cududda shaqaalaha dawladda isla markaana la gaadhsiiyey xafiisyadda goboladda ee dalka.

Hadaba, sannadka 2020ka Hay'adda Shaqaalaha Dawladdu waxa ay diyaaray iyada oo kaashanayso khuburo caalamiya (International consultants) siyaasado iyo habraacyo kale oo uu ka mid yahay 'Hagaha hab'maamuuska qaranka' oo aynu qodobka hoose ku sharxi doono;

## 11.1 HAGAHA HAB MAAMUUSKA QARANKA

Hay'adda Shaqaalaha Dawladda oo kaashanaysa xafiiska madaxtooyadda iyo wasaaradda arimaha dibadda iyo iskaashiga caalamiga ah ee Somaliland ayaa waxa ay diyaarisay hagayaasha hab-maamuuska qaranka (National Protocol Manual). Howshan waxa sidoo kele gacan ka siin ayay Hay'adda Shaqaalaha Dawladda khuburo iyo dublamaasiyiin caalamiya oo dalka u yimi diyaarinta hab-maamuuskan. Hagayaasha iyo hab-muuska qaranka ee la sameeyay ayaa kala ahaa sidan;

- Hagaha hab-maamuuska qaranka
- Hagaha tababarka hab-maamuuska qaranka
- Qorshaha hirgalinta hab-maamuuska qaranka
- Qaabka loo marayo diyaarinta warbixinta hab-maamuuska qaranka (reporting format)

Dhamaan hagayaasha aynu kor ku sheegnay ayaa noqon doona kuwo si buuxda uga shaqeeya xafiisyadda madaxtooyadda iyo wasaaradda arimaha dibada iyo iskaashiga caalamiga ah oo ay khuseeyaan. Markii la dhamaystiray hagayaashan waxa markiiba lagu tababaray shaqaalaha ka shaqeeya waaxyaha hab-maamuuska madaxtooyadda iyo wasaaradda arimaha dibadda waxana rajo wayn laga qabaa in hagayaashani kor u qaadan nidaamka iyo hab-maamuuska guud ee qaranka isla markaana qurxiyaan xidhiidhadda caalamiga ah ee aynu dunida kale la leenahay;




***Xigasho; 2020, HSHD, Buugta hagaha hab-maamuuska qaranka.***

### 11.2 DIYAARINTA SIYAASADDA IYO XEERKA HAWL-GABKA QARANKA

Sidoo kele siyaasadaha iyo xeerarka ay Hay'adda Shaqaalaha  Dawladdu sannadkan diyaarisay waxa ka mida xeerka iyo siyaasadda hawl-gabka qaranka. Siyaasadan oo muhiimad wayn u leh guud ahaan adeegayaasha iyo shaqaalaha qaranka, waxa ay damaanad qaadaysaa marka uu shaqaaluhu gaadho da'da hawl-gabka in uu xanaano iyo daryeel ku yeelan doono qarankiisa.

Siyaasadaha iyo xeerka hawl-gabku waxa la unkay kadib markii lasameeyey daraasaad cilmi baadhiseed, Kulamo gaar ah oo is daba jog ah oo lala qaatay shaqaalaha dawladda iyo kulamo wada tashi oo lala qaatay dhamaan daneeyayasha qorshaha hayaanka hawl-gabka iyo cidii ay qusaysayba, laguna ogaaday inuu qiima weyn uleeyahay qaranka in lasameeyo qorshahaaas yahayna lagama maarmaaan markii la  arkay baaahida ay u qabaan shaqaalaha waayeeloobay ee mudada badana usoo shaqaynayey qaranka haaatan se aan hayn awoodii, tamartii iyo kartidii buuxday ee ay inta badan wax badan ugu soo qabteen qaranka una baahanyihiin in maadaaba ay qaranka soo ilaaliyeen una soo halgameen mudo badan hada iyaga la ilaaliyo laguna ilaaliyo habkan cusub ee hawl-gabka.

## 12.SHIRARKA IYO AGAASIMKA XAFLADAHA LAGU DARDAR GALIN AYO HAWLAHA SHAQO

Hay'adda Shaqaalaha  Dawladdu waxa ay sannadkan dhamaanaya ee 2020ka qaban qaabisay shirar kala duwan oo looga hadlaayay horumarinta dhinacyadda kala duwan ee shaqaalaha dawladda, iyada oo sannadkan ay jireen caqabado ay ugu waawaynaayeen xayiraadihii uu sababay xanuunka safmarka ah ee COVID-19 oo baajiyay shirar iyo wadatashiyo qorshaysnaa, balse halkan

waxa aynu ku xusi doonaa shirar dhawr ahaa oo qabsoomay kuwooda ugu muhiimsan iyo natiiyooyinkii ka soo baxay shirarkaas;

### 12.1 SHIRKII WADA TASHIGA XEERKA IYO SIYAASADDA HAWL-GABKA QARANKA

31 Augosto 2020 waxa magaaladda Hargeisa ka qabsoomay shir wayn oo ay soo agaasimtay Hay'adda Shaqaalaha dawladdu, shirkaas oo looga hadlaayay isla markaana looga tashanayay xeerka iyo siaasadda hawl-gabaka shaqaalaha qaranka waxana ka soo qaybgalay masuuliyiin ay ka mid yihiin Wasiirka shaqo-galinta iyo arimaha bulshada, wasiirka wasaaradda diinta iyo awqaafta, wasiirka wasaaradda qorshaynta qanka, wasiirka wasaaradda cadaaladda, garyaqaanka guud ee qaranka, culimo awdiin iyo aqoonyahano ka socday jaamacadaha dalka.

Shirkani waxa uu ahaa markii ugu horaysay ee noociisa oo kale lagu qabto dalka iyo guud ahaan dhulka soomaalidu dagto, waxyaabaha ugu waawayn ee shirkan lagu falanqeeyay ama laga doodayna waxa ka mid ahaa sidii shaqaalaha hawl-gabka ah ee mudada dheer dalkooda u soo shaqaynayay loo nasin lahaa, fursadna loo siin lahaa dhalinyaradda firfircoon ee jaamacadaha dalka ka qalin-jabiyey.

Masuuliyiintii shirka ka soo qaybgalay waxa ay ku dheeraadeen faa'iidooyinka iyo muhiimada uu barnaamijkani u leeyahay guud ahaan qaranka, waxanay ku booriyeen Hay'adda Shaqaalaha Dawladda in ay dadajiso hirgalinta barnaamijkan iyagoo mararka qaar ku darsanayay afkaartooda sida ugu fudud ee barnaamijkan loo hirgalinkaro. Culima awdiinka shirka ka soo qaybgalay ayaa iguna si wayn u sharaxay qaababka ay shareecada islaamku u jideysay hawl-gabka iyo loo xanaaneeyo dadka shaqada ka fadhiista.

### 12.2 KULANKII WADA TASHIGA AGAASIMAYAASHA GUUD EE WASAARADAHA



Sidoo kele Hay'adda Shaqaalaha Dawladdu waxa ay sannadkan qaban qaabisay kulan wadatashi oo Agaasimayaasha guud ee wasaaradaha iyo hay'adaha dalka oo dhami ka soo qaybgaleen, kulankan oo qabsoomay 10 May 2020 waxa looga tashaday hirgalinta 16 habraac sharci ee ay diyaarisay Hay'adda Shaqaalaha Dawladdu iyo sidii ay wasaaradaha iyo hay'adaha dawladdu ula jaan qaadi lahaayeen barnaamijka dib u habaynta shaqaalaha iyo hirgalinta siyaasadaha iyo qaab-dhismeedyada ay hay'adda shaqaaluhu soo saartay.

Kulankan agaasimayaasha waxa si gaara diiradda loogu saaray laba ka mida 16 habraac sharci oo ahaa "Siyaasadda Shaqo qorista iyo Siyaasadda qiimaynta iyo dabagalka shaqadda iyo shaqaalaha" gabagabadii shirka waxa laysla qaatay in si haboon loo hirgaliyo habraacyadda sharci guud ahaan isla markaana la dabaqo siyaasadda shaqo qorista iyo siyaasadda qiimaynta iyo dabagalka shaqadda.



## 12.3 KULANKA SADEX-BILOODLAHA AHAA EE GUDIGA MASHRUUCA

Shirarka kale ee ay Hay'adda Shaqaalaha Dawladdu sannadkan qaban qaabisay waxa ka mid ahaa shirkii gudida wasiiradda ah ee haga barnaamijka dib u habayna shaqaalaha dawladda shirkan oo sadex biloodle ah ayaa sannadkan qabsoomay hal mar oo ahayd 11 Augosto 2020 sababo la xidhiidha xanuunka saf marka ah ee covidh 19.



*kulanka sadex-biloodlaha ah ee xubnaha gudiga mashruuca (streering committee)*

Shirkan oo ay shir gudoomin ayay wasiirka shaqo-galinta iyo arimaha bulshada oo gudoomiye u ah gudida wasiiradda ah (Steering Committee) ee hagta barnaamijka dib u habaynta shaqaalaha dawladda waxana kulan looga dooday arimo la xidhiidha mashruuca dib u habaynta shaqaalaha dawladda ee baanka aduunku taageero, waxanay kooxda wada mashruuca ee Hay'adda Shaqaalaha Dawladda ka dhagaysteen warbixino wixii mashruuca u qabsoomay mashruuca bilihii la soo dhaafay iyo caqabadihii ka horyimi.

Sidoo kele intii shirku socday waxa si faah faahsan loo lafo guray arimo badan oo ay ka mid yihin heshiiska mac-hadka shaqaalaha dawladda ee CSI uu la galay Mac-hadka shaqaalaha dalka Ghana iyo kor u qaadista tababaradda macadku bixiyo ee uu siiyo shaqaalaha dawladda. Sidoo kele gudigu waxa ay ka doodeen hirgalint barnaamijka casriga ah ee habmaamulka shaqaalaha dawladda (Human Resource Information System) iyo arimo la xidhiidha horumarinta shaqaalaha dawladda.



*Xigasho; 2020, hshd kulanka sadex-biloodlaha ahaa ee xubnaha gudiga mashruuca (streering committee)*




*Xigasho; 2020, hshd kulanka sadex-biloodlaha ahaa ee xubnaha gudiga mashruuca (streering committee)*



*Xigasho; 2020, hshd kulanka sadex-biloodlaha ahaa ee xubnaha gudiga mashruuca (streering committee)*

## 12.4 ABAAL MARINTA SHAQAALIHII HAY'ADDA EE SANNADKII 2019KA.

Bishii Feberwary 26 keedii sannadka 2020ka waxa Hay'adda Shaqaalaha ka qabsoontay munaasibad ay soo qaban qaabisay waaxda qiimaynta shaqadda iyo shaqaalaha ee Hay'adda Shaqaalaha Dawladda xafladdan waxa lagu abaal marin ayay shaqaalihii muujiyay sannadkii hore ee 2019ka kartidda iyo shaqo wanaaga.

Xafladdan waxa lagu gudoonsiiyay shaqaalihii sannadkaa muujiyey kartida iyo shaqo wanaaga hadyado lagu dhiirigalin ayo halka kuwii kalana lagu booriyay in ay sannadka soo socda muujiyaan dadaal iyo shaqo wanaag horleh, waxana masuuliyiintii xafladda ka soo qaybgalay oo u badnaa wasiiro ku boqaadiyeen Hay'adda Shaqaalaha Dawladda iyo waaxda qiimaynta shaqada iyo shaqaalaha dardargalinta hawlahan iyo diyaarinta xafladanba.



## 12.5 QABANQAABADA SHIRKA DHAQANGALINTA QORSHAHA SANNADKA 2020KA EE HAY'ADDA SHAQAALAHA DAWLADDA

Shirka soo afmeerida iyo dhaqan galinta qorshaha sannadka 2020ka ee hay'adda shaqaalaa dawladda oo ay ka soo qaybgaleen dhamaan masuuliyiinta iyo shaqaalaha Hay'adda Shaqaalaha Dawladda ayaa ka qabsoomay Hotel Hayat 15 January 2020ka, shirkan oo ay soo qaban qaabisay

waaxda qorshaynta ee Hay'adda Shaqaalaha Dawladdu ayaa si wayn loogu lafo guray hawl-qabadyada galaya qorshaha sannadka iyo sida loo mari dooni hirgalintoodaba.

Diyaarinta Qorshahan oo salka ku hayay qorshaha labaad ee horumarinta qaranka (NDP2) iyo qorshaha shanta sano ee Hay'adda Shaqaalaha Dawladda (CSC Five Years Strategic Plan) ayaa waxa uu xooga saarayay sannadkaa tiirar iyo halbeegyo gaara oo laga tashaday muhiimadda ay u leeyihiin guud ahaan qaranka iyo xafiiska Hay'adda Shaqaalaha Dawladda ba qodobadaas oo hada qaarkood ay warbixintani xustay.



***Xigasho; gudoomiyaha Hay'adda Shaqaalaha oo ka qaybgalay shirkii diyaarinta qorshaha sannadka 2020ka ee HSHD.***

Diyaarinta qorshaha sannadka waxa wehelin ayay samaynta qorshaha dabagalka iyo qiimaynta hawl-qabayadda ku jira qorshaha sannadka oo ay waaxda qorshayntu waday (Monitoring and Evaluation Tools), waxana si isdaba jooga u dhacayey in waax-walka iyo xafiis kasta oo kamida xafiisyadda Hay'adda Shaqaalaha Dawladda lagu daba galo qabsoomida hawl-qabadadii qorshaysnaa iyo xiligii ay qorshaysnaayeen, aan tusaaleeyo warbixintii dabagalka iyo qiimaynta hawl-qabadyadda qorshaysnaa lixdii bilood ee hore oo qaybta dabagalka iyo qiimaynta ee waaxda qorshayntu soo saartay waxana koobaysa shaxdan hoose;

| *Shaxda tirada hawl-qabadyada Qorsheysan, kuwa fuley & kuwa aan fulin* | | | | |
|---|---|---|---|---|
| **Tir** | **Magaca Waaxda /Xafiiska** | **Tirada Hawl-qabadyada lix biloodka ah** | **Tirada Hawl-qabadyada qabsoomey** | **Tirada HawlqabdyadaAan qabsoomin** |
| **1** | **Waaxda Arimaha Sharciga** | **13** | **4** | **9** |
| **2** | **Waaxda Qiimeynta Hawl-qabadyada** | **6** | **5** | **1** |
| **3** | **Waaxda Horumarinta Shaqaalaha** | **3** | **1** | **2** |
| **4** | **Waaxda Maamulka Iyo Maaliyadda** | **24** | **20** | **4** |
| **5** | **Waaxda Shaqaalaysiinta Xulista iyo Dalacaadaha** | **18** | **7** | **11** |
| **6** | **Waaxda Qorshaynta** | **8** | **8** | **0** |
| **7** | **Xafiiska Xidhiidhka Dadwaynaha** | **6** | **6** | **0** |
| **8** | **Xafiiska Xidhiidhka Goboladda** | **10** | **8** | **2** |
| **9** | **Xafiiska Hawl-gabka** | **3** | **3** | **0** |
| **10** | **Waaxda Tignoolajiyada** | **7** | **6** | **1** |
| | **Wadarta Guud** | **98** | **68** | **30** |

***Xigasho; 2020, waaxda qorshaynta ee HSHD***

Sida ku cad shaxda sare oo laga soo xigtay warbixintii qaybta dabagalka iyo qiimaynta ee waaxda qorshaynta oo ku aadanaa lixda bilood ee sannadka ugu horeeya Jan-June dhamaan waaxyaha iyo xafiisyada hawl-qabadyadda u qorshaysnaa wadartoodu guud waxa ay ahayd **98 hawl-qabad**.

Tirada guud ee hawl-qabadyada u qabsoomey dhamaan xafiisyada & waaxaha HSHD waxa ay noqoneysaa **68 Hawl-qabad**, kuwaas oo cadaymahooda (indicators) tilmaamaya in ay qabsoomeen ay ku jirto shaxda gudaheeda**.**

Tirada guud ee hawl-qabadyada dib u dhacay ama aan qabsoomin caqabado jirey awgood waxa ay noqonayeen **30 Hawl-qabad.**

Taas micneheedu wuxuu noqonayaa marka boqoley loo badalo wadarta guud ee hawl-qabadyada u qabsoomey dhamaan waaxyaha iyo xafiisyada HSHD qaybtii hore ee sannadka January-june wuxuu noqoneyaa **69%**, taasoo cadenaysa in hawl-qabadadii **98 ka ahaa** laga gaadhey **68 hawl qabad.**

Dhinaca kale Wadarta guud ee hawl-qabadyada aan qabsoomini waxa ay ahayd sida aan kor ku sheegnay 30 hawl-qabad oo marka boqoleyda loo badelo noqoneysa **31%**, taasoo macneheedu yahay hawl-qabadadii lix biloodka ahaa ee **98 hawl-qabad** ahaa waxan fulin ama dib udhacay caqabado jira awgood **31%** ka mid hawl-qabadyadaa qorsheysnaa, iyada oo caqabadaha iyo duruufaha jira ee ay u qabsoomiwaayeen agaasimayaasha waaxyaha iyo madax xafiiseedyaddu ay la wadaageen madaxta sare ee Hay'adda Shaqaalaha Dawladda .

Sidoo kele warbixintii 2aad ee qiimaynta iyo dabagalka oo soo baxday horaantii bisha diisambar ayaa waxa ay xusaysaa in hawl-qabadyadii qorshaysnaa ee ku jiray qorshaha sannadka 2020ka ee Hay'adda Shaqaalaha Dawladda ay qabsoomeen guud ahaan **70.14% (94)** oo ah tiro ka badan boqolkiiba todobaatan, halka **29.9% (40)** ka mid ahina ay qabyoobeen oo aaney hirgalin sannadkan sababo jiray awgeed, iyada oo natiijooyinka la rabay in la gaadho sannadka oo dhan ay dhamaayeen 48 natiijo (results) oo u dhiganta 25% qorshaha shanta sano ee Hay'adda Shaqaalaha Dawladda .

Sidoo kele waxa ay warbixintani xustay in ay jireen hawl-qabadyo qabsoomay oo aan ku jirin qorshaha sannadka 2020ka (Cross cutting Issues) kuwaas oo ay tiradoodu dhamayd 17 hawl-qabad. Ugu dambayntiina waxa ay warbixintu tilmaantay in caqabadaha ugu waawayn ee soo waajahay hirgalinta qorshaha sannadka iyo dhamaanba hawl-qabadadii qorshaysnaa ay ahayd in aan la helin miisaaniyadii iyo kharashaadkii lagu hirgalin lahaa ama dhamaystiri lahaa hawl-qabadyo muhiim ahaa oo qorshaha sannadka ku jiray iyo in xanuunka COVID-19 isna ahaa caqabadkale oo hor istaagtay hirgalinta kulano iyo shirar fududayn lahaa hawlahaas.

# 13.BILLADAHA IYO ABAALMARINAHA AY HAY'ADDA SHAQAALAHA DAWLADDU SANNADKAN HESHAY

Talaabooyinkii waawaynaa iyo hawl-qabadyadii sannadkan ay Hay'adda Shaqaalaha Dawladdu fulisay waxa ay ku kasbatay in ay ku hesho dhiirigalin ay ka heshay ururadda bulshada, xisbiyadda mucaaridka ah ee dalkaba iyo shakhsiyaad kaleba;

## 13.1 BILADDA ABAAL MARINTA SHAQO WANAAGA EE XISBIGA UCID GUDOONSIIYEY GUDOOMIYAHA HAY'ADDA SHAQAALAHA DAWLADDA .

18 Augosto 2020 ayey ahayd markii gudoomiyaha xisbiga mucaaridka ah ee UCID mudane Faysal Cali Waraabe Gudoonsiiyey Gudoomiyaha Hay'adda Shaqaalaha Dawladda bilad sharaf ay ugu magac dareen abaal marinta xisbiga ucid (UCID Award), biladaas oo sida saraakiisha xisbiga UCID sheegeen ay sannad kasta siiyaan masuuliyiinta dawladda ee muujiya shaqo wanaaga isla markaana ay arintani ka dhalato qiimayn ay ku sameeyaan saraakiisha sarsare ee dawladda.
Saraakiisha Xisbigu waxa ay sheegeen in arrimaha Xisbi ahaan soo jiitay ay ka mid ahaayeenn qorshaha balaadhan ee ay haatan haya'addu ku hawlantahay ee Hawl-gabka shaqaalaha, kaas oo la hirgalin ayo sannadka soo socda ee 2021-ka oo noqonaya markii ugu horaysay ee Somaliland barnaamijkaasi ka hirgalo.Waxa kale oo uu Xisbigu ku ammaanay Gudoomiyaha Hay'adda Shaqaalaha Dawladda iyo shaqaalihiisa Daah-furnaanta Imtixaanaadka loo galo fursadaha shaqo ee Laamaha Xukuumadda kasoo baxa iyo qodobo kale.
Dhinaciisa Gudoomiyaha Hay'adda Shaqaalaha ayaa ka dareen-celiyay biladda uu Xisbigu gudoonsiiyay.Waxa uu sheegay in Qaran-ahaan waxa inaga qabyadda ah iyo inta qabsoomtay aad u kala fog yihiin, balse ay talaabadan uu Xisbigu qaaday ay dhiiri-galin u noqon doonto in ay sii labban laabaan dedaalkooda ku aaddan kor-u-qaadista adeegyadda ay Bulshada u hayaan. Gabo-gabaddii waxa uu uga mahad-naqay Masuuliyiinta Xisbiga UCID go'aanka ay ugu garteen in ay guddoosniiyaan Billad-sharaftaas. Gudoomiyaha ayaa waxa munaasibaddaas kooban ku wehelin ayay Gudoomiye Ku-xigeenka Haay'adda Shaqaalaha,Cabdikariim Maxamed Cali.Dhinaca Xisbiga UCID
guddoosniiyaan Billad-sharaftaas. Gudoomiyaha ayaa waxa munaasibaddaas kooban ku wehelin ayay Gudoomiye Ku-xigeenka Haay'adda Shaqaalaha,Cabdikariim Maxamed Cali. Dhinaca Xisbiga UCID
,waxa hogaamin ayay Gudoomiye Faysal Cali Waraabe, waxana wehelin ayay Xog-hayaha arrimaha






Bulshada, Maxamuud Saleebaan Ramaax, Xog-hayaha Warfaafinta,Yuusuf Kayse Cabdilaahi iyo Xog-yahaya Xidhiidhka Goboladda iyo Degmooyinka Cabdiqani Salaf.

***Xigasho; 2020 Abaalmarinta xisbiga UCID gudoonsiiyay gudoomihaya HSHD***

## 13.2 BILADDA MAC-HADKA DARAASAADKA IYO HORUMARINTA SOMALILAND EE HIIGSI QARAN GUDOONSIIYEEN GUDOOMIYAHA HAY'ADDA SHAQAALAHA DAWLADDA (SOMALILAND NATIONAL AWARD)

Waxa ay ahayd 12 Feberwary 2020 dhalinyarada aqoonyahanka ee Mac-hadka Daraasaadka iyo Horumrainta Somaliland ee HIIGSI QARAN ay gudoomiyaha Hay'adda Shaqaalaha Dawladda ku maamuuseen biladda abaalmarinta ay ugu magac dareen Somaliland National Award oo sannadkiiba mar ay bixiyaan iyagoo ku sababeeyay in uu gudoomiyaha Hay'adda Shaqaalaha Dawladda iyo xafiiskiisuba ku mutaysteen shaqooyinkii waawaynaa iyo isbadalka la taaban karo ee ay ka sameeyeen hab-maamulka shaqaalaha dawladda.




Sidoo kele xubnahani waxa ay gudoomiyaha ku dhiirigaliyeen horumarka ay Hay'adda Shaqaalaha Dawladdu ka samaysay kor u qaadista aqoonta shaqaalaha qalabaynta xafiisyadda, daraasadaha la xidhiidha adeega caafimaadka iyo horumarinta nolosha shaqaalaha, iyo Hay'adda Shaqaalaha saraakiisheeda iyo shaqaaleheeduba u dhabar adaygeen hawlo shaqo oo baaxad leh.

Ugu dambayn gudoomiyaha Hay'adda Shaqaalaha  Dawladda  ayaa ka gudoomay abaal marinta ugana mahadceliyey dhalinyaradan in ay garteen ina ku abaal mariyaan dadaaladii nafhurka lahaa ee isaga iyo guud ahaan shaqaalihiisa ay sameeyeen.



***Xigasho; 2020 gudoomiyaha Hay'adda Shaqaalaha  oo ka gudoomay abaalmarinta Somaliland National Award xubnaha mac-hadka Daraasaadka iyo Hurumarinta Somaliland  ee HIIGSI QARAN.***

# 14.HESHIISYADDA HAY'ADDA SHAQAALUHU SANNADKAN GASHAY

Hay'adda Shaqaalaha Dawladda oo kaashanaysa Mashruuca dib u habaynta shaqaalaha dawladda ee CSSP waxa ay heshiisyo waawayn la gashay jaamacado aduunyada kale ah iyo shirkado caalami ah oo Hay'adda Shaqaalaha kala shaqaynayay barnaamijyadda horumarineed ay hay'adda shaqaaluhu wado kuwaas oo isug jiray heshiisyo waxbarasho iyo kuwo la xidhiidha fududaynta hawlaha casriyeynta nidaamyadda maamul ee Hay'adda Shaqaalaha dawladda. Heshiisyadaas waxa aynu ka xusi karnaa heshiiska mac-hadka shaqaalaha dawladda ee CSI iyo mac-hadka shaqaalaha ee dalka Ghana GIMBA, iyo heshiis dhanka luuqadda ah oo lala galay jaamac ku taala dalka ingiriiska.

## 14.1 HESHIISKA MAC-HADKA SHAQAALAHA DAWLADDA EE CSI IYO MAC-HADKA SHAQAALAHA EE DALKA GHANA (GIMBA)

Hay'adda Shaqaalaha Dawladda oo kaashanays mashruuca dib u habaynta shaqaalaha dawladda ee CSSP waxa ay ka hawlgaleen heshiiska lagu mataanaynayo mac-hadka shaqaalaha dawladda ee CSI iyo mac-hadka shaqaalaha dawladda ee dalka gaana oo loo yaqaano Ghana Institute of Management and Public Administration (GIMPA).

Heshiiskan oo xafladda dahfurkiisa lagu qabtay Hargeisa 22 Augosto 2020, waxa uu nuxurkiisu ahaa in ay labada Machad iska kaashadaan waxyaabahan soo socda.

- Qaadista qiimayn Tababar oo baaxadleh si loo ogaado adeega waxbarasho ee ay shaqaalaha dawladdu u baahan yihiin.
- Samaynta Manhaj waxbarasho oo ku salaysan baahida waxbarasho ee ka soo baxda qiimaynta la sameeyey.
- In la tababaro Macalimiintii ku shaqayn lahayd Manhajka cusub.
- In qiimayn lagu sameeyo heerka uu gaadhsiisanyahay adeega Mac-hadka Shaqaalaha Dawladdu, si loogu kabo wixii kadhiman loona gaadhsiiyo heer loo aqoonsankaro Machad Caalamiya haday tahay culuumta uu bixiyo, Manhajka uu isticmaalo, aqoonta shaqaalaha uu haysto iyo agabka uu isticmaalayo.




***Xigasho; 2020 Madaxweyne ku xigeenka JSL oo ka qaybgalay xafladda daah-furka heshiiska mac-hadka shaqaalaha dawladda ee CSI iyo mac-hadka shaqaalaha ee dalka Gana ee GIMPA***

## 14.2 HESHIISKII DHANKA LUUQADAHA EE MAC-HADKA DALKA ENGIRIISKA LALA GALAY

Machadku wuxuu heshiis dhinaca tababarrada Luuqada Ingiriisiga ah lagalay Machad Laga leeyahay dalka Ingiiska oo loo soo gaabiyo magaciisa ACH. Kaas oo ay Mac-hadka Shaqaalaha Dawladdad iska kaashan doonaan bixinta tababarrada luuqada Ingiriisiga, taas oo looga gol leeyahay sidii kor loogu qaadilaaha aqoonta luuqada ee shaqaalaha Dawladda si ay awood ugu yeeshaan dhigashada heerarka kala duwan ee jaamacadaha iyo helista waxbarasho dibedeed oo ku xidhan luuqada. Si taas looga midho dhaliyo waxa ay labada Machad samayndoonaaan;

- Diyaarinta Manhaj Luuqada ah
- Tababarrada Macalimiinta bixindoonta Luuqada Ingiriisiga
- Iyo qiimaynta tayada iyo qaabka dhigista luuqada

# 15.QORAALADDA CODSIYADDA LOO DIRAY HAY'ADAHA KA BAXSAN DAWLADDA.

Hay'adda Shaqaalaha Dawladdu waxa ay sannadka 2020ka la wadaagtay qoraalo iyo codsiyo ay ku dalbanayso ilaalinta iyo dhawrista sharciga shaqaalaha dawladda hay'addo iyo wasaaraddo dawli ah iyo kuwo ka baxsan xayndaabka hay'adaha dawladda, qoraaladaas waxa aynu halkan ku xusi karnaa mid kamida kuwii ugu dambeeyay oo Hay'adda Shaqaalaha Dawladdu u dirtay shirgudoonka golaha dhexe ee xisbiga kulmiye wuxuu u dhignaa sida tan;

*Mudanayaal, Sida xeerka shaqaalaha Dawladda ee xeer No: 07/97 qodobkiisa 6aad farqadiisa 2aad oo sheegaysa ka reebanaanta siyaasadda ee shaqaalaha dawladda, abaga ii tixgalin ayna sharciga shaqaalaha, waxan idinku wargalin ayaa in aanay shaqaalaha dawladda noqon Karin xubin firfircoon ma masuuliyad u qaban Karin xisbina, iyada oo looga jeedo in shaqaalaha lagu ilaaliyo in aanay ku milmin siyaasadda ee ay ahaadaan adeegayaal bulsho, khidmeeyaayaal iyo samafalayaal dadku iskugu mid yahay oo adeegooda u siman yihiin.*

*Gudida Hay'adda Shaqaalaha Dawladda waxa ay si ixtiraam leh idiin dareen siin aysaa oo idin xasuusin ayaan in xubnaha loo soo xulayo Golaha Dhexe ee Xisbiga aan lagu soo darin qof shaqaale dawladeed ah.*

*Agaasimayaasha guud wax sharci ah oo u diidaya am aka reebayaa ma jiro ilaa inta laga ansixin ayo xeerka shaqaalaha Dawladda oo qabyo qoraalkiisu wax ka tilmaamayo kaas oo la yaala Golaha Baarlamaanka si ay waajibaadkooda sharci uga gutaan.*

*Waxan rajaynayaa in aad in aad arintaa eegi doontaan insha allah.*

*Fadlan eega lifaaqa sharciga shaqaalaha qodobka 6aad oo sheegaya ka reebanaanta shaqaalaha waxa uu ka qabo ka mid noqoshada xubin firfirccoon oo xisbi urur IWM.*

*Allaa Mahad leh*

*Farxaan Aadan Haybe*
*Gudoomiyaha Hay'adda Shaqaalaha Dawladda JSL.*

***Xigasho; 2020 qoraalkii gudoomiyaha HSHD u qoray shirgudoonka xisbiga kulmiye***

**JAMHUURIYADDA SOMALILAND**
**HAY'ADDA SHAQAALAHA DAWLADDA**

**REPUBLIC OF SOMALILAND**
**CIVIL SERVICE COMMISSION**

**Office of the Chairman**

Date: 06/10/2020

**Ref: CSC/XG/HSHD/09-0759/2020:**

**Ku: Shir-Gudoonka Shirwaynaha Xisbiga Kulmiye**
**OG: Gudoomiyaha Xisbiga Kulmiye ahna Madaxwaynaha JSL**

**Uj: Shaqaalaha Dawlada iyo Xubinimada Golaha Dhexe**

**Mudanayaal;**

Sida xeerka shaqaalaha dawladu ee xeer **No: 07/97 qodobkiisa** 6aad farqadiisa 2aad oo sheegaya ka reebanaanta siyaasadda ee shaqaalaha dawlada, anaga oo tixgalinayna sharciga shaqaalaha, waxaan idinku wargelinaynaa in aanay shaqaalaha dawladda noqan karin xubin firfircoon ama masuuliyad u qaban karin xisbina, iyadoo looga jeedo in shaqaalaha lagu ilaaliyo in aanay ku milmin siyaasada ee ay ahaadaan adeegayaal bulsho, khidmeeyayaal iyo samafalayaal dadku iskugu mid yahay oo adeegooda u siman yihiin.

Guddida Hayada Shaqaalaha Dawladu waxay si ixtiraam leh idiin dareen siinaysaa oo idin xasuusinayaan in Xubnaha loo soo xulayo Golaha Dhexe ee Xisbiga aan lagu soo darin qof shaqaale dawladeed ah.

Agaasimayaasha guud wax sharci ah oo u diidaya ama ka reebayaa ma jiro ilaa inta laga ansixinayo Xeerka Shaqaalaha Dawlada oo qaybo qoraalkiisu wax ka tilmaamayo kaas oo la yaala Golaha Baarlamaanka si ay waajibaadkooda sharci uga gutaan.

Waxaan rajaynayaa inaad arintaas eegi doontaan insha Allah.

Fadlan eega lifaaqa sharciga shaqaalaha qodobka 6aad oo sheegaya ka reebnaanta shaqaalaha waxa uu ka qabo ka mid noqoshada xubin firfircoon oo xisbi urur IWM.

**Allaa Mahad Leh**

**Farxaan Aadan Haybe**
**Guddoomiyaha Hay'adda Shaqaalaha Dawladda JSL.**

Website: www.cscsomaliland.com
chairman@cscsomaliland.org
farhaibe@gmail.com

# 16. QORSHAHA SANADKA SOO SOCDA 2021KA

Qorshaha sanadka 2021ka ee Hay'adda shaqaalaha dawladda oo aanu ka soo dheegan doono qorshaha shanta sano ee Hay'adda iyo kan qorshaha horumarinta qaranka (NDP2) waxaa hay'adda shaqaalaha dawladda qorshaha sanadkan 2021ka ugu jira qodobo mihiim u ah guud ahaan horumarka shaqaalaha dawladda iyo dhamaystirka nidaamyada shaqaalaynta iyadoo la raacayo xeerka shaqaalaha dawladda, qorshayaashaas iyo hiraaladaas qorshaha ku jira waxaa ka kamida qodobadan:

**I. Diwaangalinta iyo Imtixaan ka Qaadista Shaqaalaha Dawladaha Hoose Ee Dalka**

Sanadkan 2021ka waxaa qorshaysan in hay'adda shaqaalaha dawladdu imtixaan ka qaado isla markaana diwaan galiso dhamaan shaqaalaha darajooyinka A iyo B ee ka shaqeeya dawladdaha hoose ee dalka, halka shaqaalaha darajooyinka kalana la hubin doono xogtooda la xidhiidha heerarkooda waxbarasho iyo boosaska shaqo ee ay ka shaqeeyaan. Sidaa darteedna shaqaalaha dawladaha hoose waxay ka mid noqon doonaan sanadka 2021ka shaqaalaha ay xogtaada iyo maamulkooduba hoos yimaado hay'adda shaqaalaha dawladda sida uu dhigayo xeerka dhawaan uun ay ansixiyeen goloha Wasiirradu.

II. **Dhamaystirka sharciga shaqaalaha dawladda iyo dhaqan gelintiisa**

Sida aan kor ku xusnay waxaa wax ka badal iyo kaabis lagu sameeyay xeerka shaqaalaha dawlada oo la sameeyay sanadkii 1996kii **Xeer Lr.07/1996**, iyadoo la kordhiyey tiradda qodobadda uu xeerkaasi ka koobanyey, hadaba sanadka 2021ka waxaa qorshaha noogu jirta in aanu ku dadaalno ansixintiisa iyo dhaqan galkiisa iyadoo lagu tababari doono agaasimayaasha waaxyaha sharciga ee wasaaradaha iyo Hay'addaha dawladda.

III. **Diyaarinta siyaasadda daadajinta darajooyinka shaqaalaha dawladda**

Sida aan ka warqabno nidaamka darajooyinka shaqaalaha ee hada jira waxay salka ku hayaan afar darajo oo kala ah darajooyinka 'A' 'B' 'C' iyo 'D' oo ay ku mushahar qaataan shaqaalaha dawladu, hadaba nidaamka sidan ah ee ka kooban afarta darajo wuxu keenay caqabado faro badan oo la xidhiidha kala saraynta shaqaalaha ee dhanka waayo aragnimada, aqoonta iyo xilalka shaqo iyadoo shaqaale kastaa heerkuu doono ha ka joogo aqoonta iyo waayo aragnimadee darajada u sarayse ee uu gaadhi karaa tahay darajada 'A'.

Hadaba, waxaa si wayn u muuqatay baahida loo qabo in la sameeyo siyaasadda daadajinta darajooyinka shaqaalaha dawladda (pay and grading policy), taas oo waxwayn ka gaysan doonta nidaamka darajooyinka shaqaalaha iyo hab maamulka kala sarayntooda, waxaanay qorshaha noogu jirtaa isla sanadka 2021ka hadii alle idmo in la sameeyo siyaasadaas anaga oo la kaashanayna Baanka aduunka.

**IV. Samaynta Habraaca Lagu Maamulayo Xaashida Mushahar Bixinta Shaqaalaha Dawladda (Payroll Management Guideline)**

Sanadka 2021ka Waxaa Hay'adda Shaqaalaha Dawladda u Qorshaysan In wax laga badalo nidaamka lagu maamulo xaashida mushahar bixinta shaqaalaha dawladda iyadoo loo samayn doono habraac iyo hage lagu maamulo xaashida mushahar bixinta oo fududayn doonta nidaamka mushahar bixinta shaqaalaha dawladda.

**V. Daahfurka Baadhitaano La Xidhiidha Liiska Mushahar bixinta Shaqaalaha Dawladda (Payroll Auditing)**

Sidoo kale sanadkan 2021 waxaa qorshaha ku jira in la sameeyo baadhitaano joogta ah oo lagu samaynayo liisaska shaqaalaha dawladda ee wasaaradaha iyo hay'adda dawladda (payroll Auditing).

VI. **Samaynta qaab dhismeedka Siddeed Wasaaradood iyo 19 Hay'addood**

Sida ku xusan warbixintii sanadka 2019ka waxaa qaabdhismeedyo ku haboon shaqadooda loo sameeyay 16 wasaaradood iyadoo hawshaas Hay'adda shaqaalaha dawladdu la kaashatay khuburo caalamiya iyo saraakiisha wasaaradaha qaabdhismeedka loo sameeyayba, sidoo kalena waxaa wasaaradahaa lala sameeeyay shaqo qeexyadda (job describtions) shaqaalahooda ee hoos imanaya qaabdhismeedkaas loo sameeyay.

Hadaba, sanadka 2021ka waxaa noo qorshaysan in 7 wasaaradood iyo 19 hay'addood loo sameeyo qaab dhiseedka shaqada iyo shaqo qeexyada shaqaalahooda.

VII. **Dhamaystirka Dhismaha Hawl-gabka Qaranka**

Sidoo kale hay'adda shaqaalaha dawladda oo kaashanaysa masruuca dib u habaynta shaqaalaha dawladda ee CSSP, waxay dhamaystirtay qorshaha iyo nashqadda dhisme dabaq ah oo gaar u noqon doona waaxda hawlgabka iyo xaqsiinta shaqaalaha qaranka. Dhismahan waxaa la dhamaytirayaa isla markaana lagu shaqayndoonaa sida qorshaha hay'adda shaqaalaha ku jirta sanadka 2021ka.

'

VIII. **Daahfurka Hoolka Cusub Ee Hay'adda Shaqaalaha Dawladda**

Hoolkan waxaa looga faa'idaysan doonaa in lagu qabto xafladaha ay wasaaradaha iyo hay'addaha dawladdu qabsanayaan, tababaradda iyo bandhigyadda buugaagta iyo cilmi baadhisyadda ay hay'addaha dawladdu soo bandhigayaan si loo yareeyo kharashaadka dawladda kaga baxa hodhuuladda.

IX. **Qiimaynta Qaab-dhismeedka Shaqo iyo Habka Shaqada iyo Shaqaalaha Wakaaladaha Biyaha, Baanka Dhexe, Madbacada Qaranka, guurtida iyo Golaha wakiiladda**

Qiimaynta aan kor ku xusnay ayaa iyaduna qorshaysan in la dhamaystiro sanadka 2021ka. Waxaana qorshaysan in qiimayn ka dib la diwaangaliyo isla markaana imtixaan laga qaado.

X. **Samaynta qorshaha kormeerka iyo dabagalka ee wasaaradaha iyo Hay'addaha qaranka iyadoo dabagal lagu samaynayo shaqaalaha iyo fulinta adeegyada suuban**

Sidoo kale sanadka 2021ka waxaa noo qorshaysan inaanu samayno qorshe dhamaystiran oo lagu kormeerayo isla markaana lagu dabagalayo shaqaalaha iyo habka adeeg bixinta ee wasaaradaha iyo Hay'addaha dawladda waxaananu soo saaridoonaa warbixino la xidhiidha kormeeradaas marka la dhamaystiro.

XI. **Hirgeliyo Habka Casriga Ah Ee Maaraynta Shaqalaha(HRMIS)**

Habkani waa system computerized ah oo casri ah isla markaana ka shaqayn doona isku xidhka xogaha shaqaalaha ee dhanwalba, sida xogta shaqsiga ah ee qofka shaqaalaha ah (personal file) iyo nidaamka mushaharbixinta, dalacaadaha iyo hoos u dhigista shaqaalaha, tababaradda uu qaatay iyo koboca shaqadiisa, dhamaan xogahaasina waxay u diyaar sanaan

doonaan qaab ama si online ah waxaanay caawin xoog ah ka gaysan doontaa hab-maamulka suuban ee cududa shaqaalaha dawladda.

Ugu dambayn dhamaan qodobadaas aan kor ku soo sheegnay waxay ka mid yihiin hawl-qabadyadda noo qorshaysan sanadka 2021ka kuwooda ugu mudan, iyadoo ay jiraan hawl-qabadyo kale oo inta ka tiro badan oo iyaguna noogu jira qorshaha sanadka 2021ka isla markaana aanaan halkan ku xusin.

## 16. TALO SOO JEEDIN

I. Waxa lagama maarmaan ah in sida ugu dhakhsaha badan loo meelmariyo xeerka cusub e shaqaalaha iyada oo dhowaan la hor gayn doono Golaha Wakiiladda si waajibaadkooda dastuuriga ah uga gutaan.

II. Xoojinta wada shaqaynta iyo ilaalinta sharciyada la dhaqangeliyay oo ay muhiim tahay in ay ka dhaqan galaan Wasaaradaha iyo hay'adaha Dawladda ayaa wax wayn ka tari karta horumarunta shaqaalaha, ilaalinta waqtiga shaqada iyo bixinta adeeg dadwaynaha u cuntama.

III. Waxa inagu waajib ah in aan gacmaha isu qabsano anaguna ka Hay'ad ahaan aanu daraasaad ka samayno sida ugu suurtagalsan ee waqtiga shaqada ee xeerarku waajibiyey loo shaqayn lahaa taas oo xogta daraasada ka soo baxda aanu la wadaagi doono Madaxwaynaha JSL.

IV. Waxan imika la diyaariyay qabyo qoraalka qorshaha iyo siyaasada Hawl-gabka qaranka oo u baahan in sida ugu dhakhsaha badan loo hirgaliyo isla markaana wasaaradaha iyo hay'adaha dawladdu kala shaqeeyaan Hay'adda Shaqaalaha Dawladda .

V. Si dhamaan shaqaalaha wasaaradaha iyo Hay'adaha dawladda ee madaxa banaani ay shaqo ugu abuuraan shaqaalahooda, sidoo kelena loo helo jaan goyn iyo qeexista masuuliyadaha shaqada ee xubin iyo shaqsi kasta oo shaqaale ah waxa lagama maarmaan ah in si dhamaystiran loo dhaqan geliyo qaab-dhismeedka shaqo ee wasaarad iyo hay'ad kasta.

VI. Hay'adda shaqaalahu waa hay'ad halbawle u ah shaqada iyo shaqaalaha si ay tamar badan iyo dadaalkeeda u labanlaabto waxa aad u muhiim ah in texgelin la siiyo shaqada ay hayso laguna taageero waxii duruufta dhaqaale inoo saamaxdo ee kaabis miisaaniyadeed ah sannadka 2021ka.

# 17.GUNAANAD

Warbixintani waxa ay koobaysaa waxqabadkii sannadka 2020ka ee Hay'adda Shaqaalaha Dawladda waxanay si faahfaahsan u qodobaynaysaa hawl-qabadyadii sannadkaa qorshaysnaa intii la dhamaystiray ee guulaha la taaban karo laga gaadhay.

Waxase marwalba jirikara duruufo iyo caqabado ka hor imanaya dadaaladda ay Hay'addani ugu jirto hiigsiga himilooyinka fog iyo horumarinta dhinacyada kala duwan ee habmaamulka shaqaalaha dawladda hadii aanay waaxyaha kale ee dawladdu u hagar bixin la shaqaynta Hay'addan oo qaranka ugu jirta meel halbowle ah.

Guntii iyo gabagabadii Hay'adda Shaqaalaha Dawladda oo marwalba u taagan xoojinta cududda shaqaalaha dawladda iyo tayayntooda dhinacyadda kartida iyo xirfadda shaqo si adeega shacabka loo gudbin ayaa u noqdo mid haboon oo waafaqsan hab-maamulka suuban iyo xayndaabka sharci waxa ay dardar galin aysaa horumarinta siyaasadaha iyo nidaamka maamul ee shaqaalaha dawladda.

HAY'ADDA SHAQAALAHA DAWLADDA

REPUBLIC OF SOMALILAND

CILMI CADDAALAD

CIVIL SERVICE COMMISSION